

Oktoobar - Disseembar 2024 - Cadadka 40

Ssh.80,000 - Kshs.300, USD 3

# WARSAN

WACYI-GELIN | TOOSIN | DHISID



0 792382 374045



**YAA GARAN SI LOO DHAQO!**



# Macluumaadka Gudaha

Publisher - Tifatiraha  
Nur Elmi

Managing Editor:  
Mohamed Nur

Associate Editor:  
Victor Adar

Staff Writers:  
David Onjili  
Chritine Siamanta  
Dahir A. Mahamud  
Leila Mohamed  
Fuad A. Mohamed

Designer:  
Graphic Lineups Ltd.

Advertising and Marketing:  
David Odhiambo  
Omar N. Ali

Productions offices:  
Mohamed Osman Elmi  
Mogadishu - Somalia  
+252 616 460 132  
+252 616 4643 7490

Nairobi Office:  
+254 721 883 458

Djibouti Office:  
+253 778 721 23

Contact informations:  
[warsan54@gmail.com](mailto:warsan54@gmail.com)  
[www.thewarsan.com](http://www.thewarsan.com)



**Warsan Media Ltd.**

The views and the opinions expressed in this publication are those of the authors and do not necessarily reflect the position of Warsan Magazine.

**WARSAN**  
WACYI-GELIN | TOOSIN | DHISID

5



YAA GARAN SI LOO DHAQO!

12



TURKI WAX AANAD AQBASHEEN  
HA NAGU QALQAALIN

14



SHAARCIGA TACLIINTA SARE TALA  
KUMAANAAN YEELAN!

19



MAAHA MID U XIDHAN WIILASHA,  
BAL WAA LOO SIMAN YAHAY!

23



MUXUU IMAARAADKU KA RABAA  
GEESKA AFRIKA ....

32



QOKU WUXUU BISLAADAA,  
WAKHTIGA UU WADNUHU GUBTO!

39



XORRIYAD LA'AANTA DOWLA-DE-  
GAANKA SOMALIDA !!

41



QALINKAA WAX SUUREEYE

45



TALLAABOOYIN WAALID AWOOD  
SIINAYA

47



HAKU MASHQUULIN CEEBAHA DAD-  
KA KALE!

48



SHARCIGU MAAHA QABYAALI !!

49



GABADHU SABOOLNNIMO NINKA  
WEY KU DIIDI KADHAA

51



MARKAAD IMAAM KU DABATU-  
KANAYSO FAATAXADA MIYAAD  
AKHRINAYSAA

53



XABAALUHU WAY HADLAAN EE  
DHEGIHII MAQLI LAHAA AYAA AW-  
DAN!

55



ADIGA AYAN KUU SHAQEYAA

# WEEDHA WARGEYSKA

## HADDAAN UGU BAAHI BADANNAHAY!

**W**aagii ii baryaba, waxa ka dhacaya dal-ka, waxay i xusuusineysa, halganka aan dhamaadka laheyn ee aan ugu jirnno inaan badbaadnno dad iyo dalba. Keennu (dalka) waa dalka kaliya ee Afrika ku yaal ee dhulkiisa ay qeybsadeen isticmaarkii reer Yurub iyo kuwa aan kuwaa la jinsi aheyn. Keennu, waa dalka kaliya ee dunida ku yaal ee dadkiisa lagu qasbay inay sanooyin noolaadaan xukuumad fa-caala la'aanteed.

Awoodo ayaa jira isu diray inay xaqiijiyaan, oo hubiyaan inaan guul-darreysanno-kufnno, si ay toodu u nagaato. Laakin, waxa nasiibdarro dheeriya ah, marka dadkeyga qaarkii u banbaxo, dabar-goonta waxa aan dad ku nahay.

Markaan sawiranno riyooyinkeenna guud, waa inaan donnaa, sidii aan u ahaan laheyn waddaniyiin u soo jeeda danahooda - taasoo mararka qaar naga dooneysa halgan joogto ah oo aan dhamaan. Dhab ahaan markaan uga fekernno nolosha iyo waqtiga ku baxay halgankeenna iyo halgamayaasheenna ku xusan taarikhdeenna halganka, Axmed Gurey, Aweys Al-baraaawi, Sheekh Xasan Barsane, Maxamed Cabdille Xasan iyo sidoo kale dhallinyaradii SYL, kuma deg degynno inaan dalkeenna xaraashnno.

Waa suurowdda inaan hellay madaxbannaani, laakin, hanashadeedii buu dhib naga heystaa, waayo gumeystaha ayaa habeen iyo dharaar maleega dibin-daabyo iyo tabo uu ku hantiyo dhaxalkeenna iyo innagoo farxaha is heysnna, midnnimana xaqiijin weynnay. Waajib, waxa nagu ah goor kasta inaan eegnno diunteenna, dadnnimadeena iyo ruuxa Somalinnimada ee isku keen xidha.

Bal in yar dib u fariiso- oo malee: Ma naqaan halka aan ka nimid? Ma fahamsan-nahay xaalladda hadda aan ku jirnno? Ma naqaan cidda aan nahay? Ma fahamsan-nahay, runtii ma fahamsan-nahay, halka ay noo waddo qeybsanaanta hadda? Ma fahamsan-nahay, mana nala qurxoontay, siyaasad-goboleedka yeeriya, waxa ka socda hareeraha-yaga?

Wax laga xumaado oo kaliya maaha, hayeeshee, waxay kaloooy tahay wax laga cabsado in qaareen ka fekeraan danta u gaarka ah kaliya. War waxan joognaa waqtigii aan is-uruusan laheyn oo cududdeenna isugeyn laheyn, dhanna isu raaci laheyn. War waa inaan wada shaqeynno, soona kala hormarsanno danaha dalkeenna maareyntooda. Waa ineynaan qeyb ka ahaanin oo cadowga gacan ku siin waxyellada iyo burburinta qarankeenna.

Cadowga dibadda oo tira-beelay awgeed, waa ineynaan innagu ableyda isula bixin oo dhabarka iska toogan. Waxa la joogaa waqtigii aan garafka isku qaban laheyn si aan Somaaliyadeenna u difaacnno. Yeynaan aqoonteenna u adeegsan duminta iyo cadow-kalkaalista. Yeynaan kheyraadkeenna xaraashin.

Yeynaan bowdada iska toogan oo isku mashquulin, cadowgaa fursad helayee. Waxan leenahay dal mid la siistaa jirin; aan difaacanno, oo yeynaan iibin. War hooy dal aan Somaaliya aheyn ma lihin. Waa waxa kaliya oo aan heysanno. Wax badan ayaan xaqiijin karnaa, laakin, waa markaan mid nahay, is-jecel nahay, is-buuxinno oo wax isu oggol nahay. Allow garab na sii.

**Nur Cilmi- Tifatiraha**

# YAA GARAN SI LOO DHAQO!



**M**a waxan nahay bulsho aan la hoggaamin karin? Ma jidhi karnaa hoggaan la'aan? Mase hoggaamiyaan gobeynaa weli? Waa la kufaa, waana la kacaa. Maxaa innagu gaara oo 30+ kadib, weli xaalkayagu uga sii darayaa? Yaa garan si loo dhaqo.

Culimada dabeecadaha aadanaha daraaseysa heli waa dunteenna! Sooyaalkeenna fog iyo dhow, waa midabo badan ku xeeran yihiin haliso iyo fursado is-baal ordaaya.

Tastuurka Alla aadanaha u dejiyey ee kii Maxamed (CSW) la siiyey ugu dambeeyo, asalladiisa waxa ka mida in leys xukumo, inta hoggaaminta saaxibka u ahna usha loo dhübo, laguna korjoogteeyo, si dheellin looga hortago. Qarnniyo ka hor inta aan na loo soo waardin dowladn-

nimo, xeerbeegto geedka hoostiisa talada ku gooya ayaa bulshada maamuli jiray, kalana hagi jiray.

Dowlannimadii na la ku wareejiyey lidankii (1960) ee gugii 1969kii xukunka ciidamadu kula wareegeen, tusaaluhu ma waxa uu ahoo dilki Sharmarke? Maya, ee golahii shacabka, iyadoo sharcigii horyaal ayey kari waayeen in madax-weyne Sharmarke beddela, doorashana gaarsii dalka doortaan.

Waxa leysku qabtay aan sharciga ku xallinno iyo maya Sharmarke gobolka uu ka soo jeedo ayaa dhaxal u le madaxtooyada. Is-jijiidkii ayaa kan-sho siiyey qoladii Siyaad Barre hoggaaminayey xukunkana kula wareegeen.

Ka yimid Bogga 5



**Farmaajo,**

Tii Barre, xaalad tii hore la mida ayaa dowladnnimadii lagu waayey, markii qoladii Barre diideen in xalka sharciga loo maro. 30+ kadib, waa innaga sida galeyr ban jooga kolba meel u carareyna, jahana qabsan la'a.

Haa, waa na la hoggaamin kara, haa, hoggaan la'an ma jidhi karnno, bal hoggaan noo garsoora, sharcigana dhaqa, weeye ka aqooli kara. Qaar iskuday sameeyey haddey jiraan/



**Kheyre**

jireen mid sharciga saluugsan ayaa faraqa ku dhegan oo kolba yuusaaya, diiddan in hore loo socdo. Bal eeg diidmada aan meel looga tusaale qadan ee raggi karsiga looga awood-roonaaday bilowga gugii 2022ki, iyo qaar kale

hadda wadaan. Dooddoodu, waa teendhada ha la joogo iyo mayee aan hore u socon.

Ma jiro qof loo waxyodo, aadane gefka waa loo abuuray, halkeyga aan fadhiyose xal maaha. Wuxuu ishan noo yeelay arrimo isku-raran oo amnigu ugu weyn yahay, midnnimo la'aan iyo kala qoqob siyaasadeed oo na sal dhigtay xalkana haadaan ka sii rida.

Bulshdu waa mid qeybsan, qoqoban, la nool gaajo, cudoor iyo amni-darro aan firaaqo siin. Waa bulsho leysu baheeystay oo dhanna uusan u fayoobeyn, wixii la doono lagu shubo, rarkii la doonana la saaro, mayana dibnaha soo marin. Culeyskaa aan sidnno, oo bulshada qeybaheeda oo dhan saameyn ballaaran kule, ayaa kallifay inaan si buuxda gacanta ugu dhigiwenno masirkeenna, dhaqan-dhaqaale, siyaasad, bulsho iyo amni. Cadow-gudeed iyo mid-dibadeed ayaa dhabarka nooga fadhiya.

Qiyaas qaran cadowgiisa kowaad u hindisay nidaamkii uu isku xukumi lahaa, talana aan laga siin. Qorshe, waxa leysku duway ubucddisu tahay jahwareer iyo khilaaf, si aanad ugu baraarug in musiibada aad dhexda u taal, xargaha kuu daadsan iyo jaangooyada guyalka soo aaddan in lagu dhaqo rajadu tahay.

Gugii 2004ki ayaa qorshe maamul oo federaal loo bixiyey na loo xambaariyeey, il-



**Cabdiraxman A. Shakur,**

laa maantana mushkiladihiisii lag lug bixi la'yahay. Qorshan maamul ee awoodaha la si-may, bal adigu ur u bixi, waa ka maanta horwenyteenna siyaasadda midba mid qoolka la gadayo. Intaa na la kuma deynina, innagii baa inta halka aan u



**Axmed Madoobi**

jilicsan nahay la helay, qoorta leysu kaaya geliyey, leyskuna kaaya mashquiliyey.

Sokeeeye-dagaal naga mashquiliyey difaaci xuduudahaya-ga ayaa dhabta na loo saaray, illaa ay mareyso qarannimadaa-daa igala hadal, meel dhulkaaga ka mida ayaan doonayaa inaan goostee. Kaaga daranta, saaxib aan u toog hayo ayaaba nagu qalqaolinaaya inaan qorqortanka gallo. Waa innaga gallay, meel uu nala tagaba. Cajiib!



**Sharif Sh. Axmed**

Dowladiihii ku-meel-gaarka iyo ku-meel-gaar ka baxa ee soo bilowday gugii 2004ki, waa innaga weli la baaxaa degeeyna, salkana u dhigi la'a. Gugaas siyaasiyiintii siyaasadda soo galay, kuwii ka soo dega-rogtay Carta iyo kuwa ay dhaleen ayaa kolba kursiga la kala wareega. Mid dhintay maahee, mid ka howl-gabab lama shaacin.

Siyaasiyiintan xukunka isku beddela, kari waa, inay salka u dhigaan hal hey'ad oo ka mida kaabayaasha dowladnniumada. Bare (Ajinabi) cilmiga siyaas-

adda ka dhiga jaamacadda (Oxford) ee Landdan, daneeye Somaalida iyo hoggaaminteed ayaa sidan le, "waa naadir inaad Somaalida ku aragto sarkaal mansab sare haya oo danaha qarankiisa ka horreysiya kuwa qabiilkiisa, kursigiisa ama kuwiisa gaarka ah".

"Horweynta xukunka Somaaliya u kaltama, ciil miyaan qabi lahaa, haba na xukumeene, haddeey ku heshiin lahaayeen inay ka fuula kansho u siiyan inuu afartiisa sano buuq la'aan dhameysto, bal hadduu laba dhagax isu kaaya saari karo, bare kale (Somali) ayaa sidaa ku cawday". Waa saase, ka fulay haddu isku dayo inuu wax dh-aqaajiyoo, waa kuwa mucaaradku markiiba ka sanqadhiya "ku darsashuu rabaa, run kama aha iyo wax la mida".

### TAJRUBA HOGGAAMINEED

Xasan Sheekh Maxamuud, (waa



**Deni**

madaxweynaha haddee) ayaa dalkaa la kaca-kufaaya rarkaa culus maanta hoggaamiya, rarkana hadda isagaa sida. Rarkani, madaxweyne Xasan, waxa uu ku yahay tajruba hoggaamineed oo baalasha soo socoda halyey la mahadiyey ama la eeday ugu qori doona, su'aasha in la jaleeco u baahanse waxa weeye, Xasan waa kuma, rarka ninkii halka lala rabo geyn la-haase ma yahy?

Madaxweyne Xasan gugii 1991ki ayaa waxa uu ka mid noqday saraakiishii dhinaca

From Wikipedia, the free encyclopedia

(Redirected from [Somali president](#))

The **president of Somalia** (*Somali: Madaxweynaha Soomaaliya*) is the **head of state** of Somalia. The president is also **commander-in-chief** of the **Somali Armed Forces**. The president represents the **Federal Republic of Somalia**, and the unity of the Somali nation, as well as ensuring the implementation of the Constitution of Somalia and the organised and harmonious functioning of the organs of state.<sup>[3]</sup> Currently, the president of Somalia is **indirectly elected**, chosen by the **Federal Parliament of Somalia**.

The office of the President of Somalia was established with the proclamation of the Republic of Somalia on 1 July 1960. The first president of Somalia was **Aden Abdullah Osman Daar**, and the 10th office of presidency is currently held by **Hassan Sheikh Mohamud**.

**History** [ edit ]

The first president of Somalia was Aden Abdullah Osman Daar, one of the leaders of the **Somali Youth League** (SYL), who took office on 1 July 1960, the day on which Somalia was declared a republic. Since then the office has been held by eight further people: **Abdirashid Ali Shermarke**, **Mohamed Siad Barre**, **Ali Mahdi**, **Abdiqasim Salad**, **Abdullahi Yusuf**, **Sharif Sheikh Ahmed**, **Mohamed Abdullahi Farmaajo**, and **Hassan Sheikh Mohamud**. In addition, **Sheikh Mukhtar** acted as president between Shermarke's assassination and the **coup d'état**, and **Aden Madoobe** acted as president after Yusuf's resignation in 2008.

Sharif Sheikh Ahmed took office on 31 January 2009, after being elected by the **presidential election** held in January 2009. Ahmed's term as President of Somalia officially ended in August 2012, concurrent with the conclusion of the transitional federal

Checked

**Appearance** hide

Small

Standard

Large

Standard

Wide

**Color (beta)**

Automatic

Light

Dark

**President of the Federal Republic of Somalia**  
*Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed*



**Presidential Seal**



**Flag of Somalia**



Eeg Bogga 8

waxbarashada ee Unicef, meelo badan oo dalka ahna waa uu ka shaqeeyey. Qoraal ay BBC-du ka diyaarisay lixdii Maajo, 2022kii, waxa lagu sheegay inta uu howshaa ku jiray inuu arkay baaxadda burbur ee waxbarashada dalka ku dhacday.

Saddax sano kadib, Xasan waxa uu Muqdishu ka furay dugsigii ugu horreeyey (hoose-dhexe) dagaallda dheddooda. Door weyn ayuu sidoo kale ku yee-shay u hiilinta aminga iyo kala dambeynta isagoo kala shqeeyey cid kasta oo ku howlaneyd. Waa qunyar socod siyaasada-hiisa khadka dhex ku arooriya. Dadka yaqaan, waxay ku til-maamaan nin looga dambeeyo xallinta xasarada iyo nabadeyn-ta bulshada.

Waxa uu si dhow ula soo shaqeeyey dhaqanka iyo madaxda bulshada qeyba-hooda kala duwan. Waxa aad loogu xusaa, looguna amaanaa doorkii uu ku lahaa wada-xaa-joodkii suurageliyey in Xamar looga qaado khadkii cagaarnaa ee qeybiyey, gugii 1997kii. Sidoo kale, la-taliye ayuu u soo noqday hey'ado badan oo caa-lami ah.

Waxa la aaminsan yahay mush-kilad Somaaliyed oo xalkeeda ama ka tala -bixinteeda uusan Xasan gacan ku yeelan jirin. Waa nin deggan oo aan go'aanka ku degdegim, weji furan, anse la odorosi karin tallaabda xigta ee uu qaadaayo. Saameyntiisa ballaaran ee bulshada, waa ta

(Time magazine) ku xamaartay inuu ku daro/ 100ka qof ee dunida ugu sameeynta badanaa gugii 2013kii.

Haseyeshee, mucaardkiisu waxay ku eeddeyaan inuu talada gacantiisa ku uruuriyo, cidna tala ka qaadan. Waxa kaloo lagu eeddeeyaa, si kastuu waaya-arag ugu yahay xaalada-ha dalka iyo xalku halka uu jiro, haddana xulashadiisa saraakii-sha sare ee uu xalka u kaashado ayaa kaaf iyo kala dheeri ah. Xil iyo qof aan qaadi karin inaad dowladda madaweyne Xasan ku aragto la yaab maaha.

Haddii Xasan lagu timaa-may xalliye, degane, aqoon-le, waaya-aragle, kuwa hadda miiska u saaran ee gudaha iyo dibaddaba le, siduu u wajahay? Madaxweyne Xasan markii labaad ayaa madaxtooyada gacanta loo geliyey gugii bi-sha Maajo aheyd 16, 2022kii. Sooyaalka qalafsan ee 30kii gu ee na dhaafay Somaaliya martay, mid uga xog-ogaalaalsan ama waaya-aragsan madax-tooyada sooma marin. Dhacda kasta ee dalku maray, hubaal inuu goobjoog ahaa, hay-eeshee, maareynta dowladnnimada dal sokeeyahiisu qeybsan yahay ma sahlana.

Laba gu iyo waxoogaa ayaa af-artii gu ee sharcigu u qoond-eeyey ka tagtay, waxase la odhan karaa judhiiba madax-weynuhu dhibane ayuu u no-qday dhaliilo gees walba kaga imaanaya, oo ku aaddan sida u

maareeyo siyaasadda iyo dh-aqaalaha dalka. Maxaa ka runa ama beena, waa maqaal iyo maqam kale, ha'ahaatee, waxa horyaala tajruba hoggaamin-eed oo adag.

Waxa furan aagag dagaal-si-yaasadeedyo qadhaadh oo curyaamin kara tallaabooyinka loo qaadayo dhinaca horumarinta dowladnnimada. Aaggaga ugu kulul, waxa ugu horreeya kuwa ka kacsan MOU-da iyo ka d/gobolyeedyada, sida uu u maareeyana waqtigaa sheegi doona.

### **MoU-da**

MoU-da oo la saxiixay bilow-gii gugan 2024ka, maalin uun kadib, shirkii madaxweyne Xasan, Biixi iyo madaxweyne Geelle, Xasan waxa uu ka muujiyey fila-waa iyo wax aan looba fadhiyin, judhiibana waxa uu qaaday tallaabooyin taxana oo uu uga hortegaayo meel marin-teeda.

Xasan oo dadka yaqaan yidhaahdaan "haddii degani ifka saaran tahay, Xasan waa kow" haddana isla dadkaa ayey fila-waa iyo anfaruur ku noqotay, sida bey leeyihii aan ka fiirsti iyo tala wadaag badan laheyn ee madaxweynuhu arrinka u wajahay iyo heshiisyada millatari ee degdegga loola saxiixay dhowr dowladood oo qaar haddii arrinku shan farood iyo calaacal gaadho, wax badan soo kordhineyn. Qaar kalaa le, mayee, qaadashada go'aama-



### Sawir farrin cad diraya, cid la soo baxdase u baahan. Abiy-Bixi ka weyn arrintu!

daa degdegaa, waa tallaabo beenineysa kuwa warinaayey in madaxweynuhu arrinka siigogaa.

Sida uu u maareeyey, inay ugu liidato baa la qabaa, ta Turkigu hindisay ee xukuumadda oggoleysiisay in qarannimadii cadow soo jireena lagala qorqortamo. Dad baa qaba, in Turkigu arrinta ku degdegay, wax uu isagu aqbaleenna culeys ku saaro madaxda Somaalida. Turki marka hore bey leeyihii muu Abiy soo oggoleysiyo inuu fagaaro MoD-da uga noqdo, inta aan wadahadalba lagu fekerin. In leysmari-waayey ayaa raja fiican, dowladda in lagu garab-joogsadana waajibineysa.

Xiriirka d/goboleedyada iyo

maamulka Hargeysa-

Madaxweyne Xasan, waxa laga raacay dhowr hindise-sharchiyeedyo qaar dhaafay gola-yaasha sharci-dejinta, qaarna weli la yaalaan oo doorashadii teendhada looga maarmaayo, xisbiya abuuraya, unkayana madaxweyne iyo ku-xigeenkiiisa. Diiameda qayaxan ee mucaaradka, iyo ku dheganaanta teendhadu, maaha mid dana qarameed loogu adeegaayo, hore in loo socdo bey dantu ku jirtaa, xataa haddey ku qarsoon tahay mid gaar ku fulinteeda.

Shirkii ugu dambeeyey ee d/goboleedyada loo qabtay Oktoobar 27, 2024ka, waxa joogay saddax d/goboleedyo, iyadoo Axmed madoobi oo kii joogay,

kana baxay intaan wax la go'aamin ayaan ka soo qeybelin. Ahmed madoobe, oo wax ka saxiixay heshiisyada golayaasha maray ama la yaal, diidmadiisu waa mid salka ku heysa baa la qabaa, "mid aan isku ardaa nahay baa kulanka ka maqan".

D/goboleedyada laga lug bixi maayo inta uu maqan yahay sharciga federalka ee xadelyn lahaa awoodaha hadda simanta ah. Bartamihii Bishan, waxay xukuumaddu wasiirka kowaad u sameysay ku-xigeen labaad iyo wasiiru-dowlayaal badi-dood la siiyey dad ka soo jeeda hal d/goboleed. Tallaabadaasi, waa daaqad furantay, sida loo owdana adkaan doonto soo socotada.



Abbi, Biixi

## Biixi iyo MoU-da

Madaxweyne, Sida uu qabay siyaasigii weynaa ee reer Faransiiis (Kardinal Rijilliyo), dawla-daha adduunku kagama helaan magac iyo sumcad in ay qabtaan wuxuu saxda ama xaqqa ah kaliya, waxa lagu abaal-mariyaa in ay yihiin kuwo awood u leh inay sameeyaan wuxuu lagama maarmaanka ah.

Doonista Itoobiya ee baddu, waa arrin muddo dheer soo jirtay; maalinbana heer taagnayd, ilaa hadda ay noqotay mid suurtagalnimadeeda dadka daneeyaa rajo ka qabaan. Loolan kasta oo dunida ka dhaca, cidda ku guulaysata, waa cidda hadba sida ugu fiican uga faa'i-

daysata fursadaha horyimaada iyo sida dhanka kale uu u dayaco fursadihiisa. Itoobiya, waxay u muuqataa mid si fiican arrintan ugu soo diyaar garawday, halka Somaaliya ay u muuqato dhidar onkod kiciyey.

Haddii jug siyaasadeed dhacdo, waxa fiican in si habboon looga falceliyo oo aan la galin xaalad wareer ah oo keeni karta in la heli waayo tubta ugu fiican ee loo falcelin karo.


Marka la eego dhaqdhaqaqyadii madaxweynaha iyo hadallada isdaba-joogga ah, waxa la odhan karaa madaxweyne Xasan wali muu helin tubtii saxda ee uu Hargeysa u maareyn la-haa. Tubta Turkigana ku daroo.

Madaxweyne, si walaaltinnimada Soomaaliyeed ee aad ku baaqdo u xoogeysato, Soomaalilaan u bandhig wax ku dhow waxay Itoobiya miiska keentay (counteroffer). Dunida maantu waa mid aan tixgelin badan looga heyn sharciyo calami ah oo mar hore la giidhgiidhay. Sharci la xeerinaayo hadduu jiro (Gaza) gumaadka laga joojin lahaa. Madaxweyne, arrinta Waqooyi, waxa uu u baahan yahay inaad il gaara ku eegto, lana timaado qorshe siyaasadeed oo xalka soo dhoweyn kara, iyadoon midnnimada la wiiqeyn.

**WQ: Tifatiraha**



## OUR SERVICES



## CONTACT US

Giyaajo Business Center KM4,  
Mogadishu-Somalia.

+252 612 464 864  
+252 637 555 597

info@barakatakaful.com  
www.Barakatakaful.com

# TURKI WAX AANAD AQBASHEEN HA NAGU QALQAALIN

**M**a garanaayo, sida Turkigu isugu qanciyey inuu dal uu saaxib dhow la yahay dana badanna ku leeyahay, ugu bandhigo qarannimadaada gorgortan kala gal cadow hollinaaya inuu dhul kale Somaalida xorta ah ka goosto. Sidoo kale, ma garanaayo sida xukummadda Somaaliya loogu qanciyey inay hindisaa aqbasho, lana fariisato cadow weliba aanuu wadahadalku dhab ka aheyn. Sow dow maaheyen in Turkigu marka hore Abiy oggoleysiyo inuu fagaare uga noqdo arrinka xasarada kiciyey ee

MoU. Haa, waa run, turky saaxib dhow weynnu nahay, goor dunidu naga jeesatayna yidhi; maya, Somaaliya saaxib waqtiga adag garab jooga wey leedahay, waana Turki.

Socdaalkii madaxweyne Ordogaan ku yimid Xamar 19kii Agoosto, 2011kii, dhiig cusub buu ku shubay saaxibtimada labada dal iyo shacab. Somaaliya, waxay uga jawaabtay si ka qara weyn ta Ordogaan bilaabay oo waxa Turki gacanta loo geliyey ilaha dhaqaalaha Somaalidu maanta ka hesho (dekadda, garoonka Muqdishu).



**Wasiirrada Turki, Somaaliya, Itoobiya**

Waxa lagu siiyey heshiisyo aan fagaare lagu saxiixin, marinna hey'adaha dastuuriga ee qarankan, tuhunkuna yahay in Turkiga loogu sadburiyey. Sida ku cad warbixin-sannadeed 2023da ee uu hantidhowraha guud ee qaranku soo saaray, waxa la sheegay in labada sharikadooda ee maamula dekadda iyo garoonka Xamar xataa diideen in hantidhowrka qaranku baaritaan saxa ka sameeyo dheef-qeybsiga soo xarooda, laamaha kale dowladdana weli tallaabo arrintaa ka qaadeen lama shaacin. Warbixinta oo dhameystiran halkan ka fur: <https://oag.gov.so/>



**Alper Aktas- Safiirka Turkiga Somaliya**

Saaxibtinnimo halkeedee, ka maarmi meyso in sidii cadow loo xisaabtamo, badqabka labada danood awgeed. Turki shacbiyad xad-dhaafa ayuu bulshada Somaaliyeed ku dhix leeyahay, bal, waxay u egtahay in shacbiyaddaa derbi loo riixaayo, dildilaacna yeelan doonto goor aan fogeyn. Turki maaha wax aanuu aqbaleen inuu madaxda Somaaliyeed culeys ku saaro, iyadoo laga faa'ideysanayo jilicsanaanta dowladnnimo ee qarankani la ildaran yahay. Turki maaha ciddii laga fili lahaa inuu hoosaasiyo heshiisyo beenaad qarannimada Somaaliya lagu wiijqayo.

#### **2.1. Dakhliga Heshiisyada Dheef-wadaagga ah US \$34,261,371.00 (Tixraac 2<sup>nd</sup>, Bogga 34<sup>nd</sup>)**

Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa labo heshiis oo dheef-wadaag ah (concession agreements) la gashay labo shirkadood oo caalami ah kuwaas oo kala ah: Favori LLC oo maamusha Garoonka Calamiga ah ee Aadan Cadde iyo Mogadishu Alport corp. Albayrak-Somalia oo maamusha Dekadda Xamar iyaga oo matalaya Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Sida ku xusan tixraaca 2<sup>nd</sup>, qabashada lacagaha caddaanka ah ee aan cashuurtta ahayn ee ku jira qulqulka dakhliga iyo kharashaadka ee 31<sup>st</sup> December, 2023 ayaa muujinaya caddad dhan US **\$104,859,949.00**. Waxa ku jira haraagan wadar guud oo dhan US **\$34,261,371.00** oo ah dakhliga ka soo xarooday qandaraasyada dheef-wadaagga ah (Mogadishu Alport corp. Albayrak-Somalia - US **\$30,288,871.00** & Favori - US **\$3,972,500.00**). Intii lagu guda jiray baarista, waxa aan codsaday in maamulkoo ilaa wadaago warbixinnda maaliyadeed ee qandaraasle walba oo la baaray sida ku xusan heshiisyada dheef-wadaagga ah ee ay labadaas shirkadood kula jiraan DFS hase ahaatee, maamulkoo ilama wadaagin warbixinnda maaliyadeed ee la baaray si aan u caddeeyo saamiga ay leedahay DFS, sidaa darteed, wadarta lacagta la ururiyay oo dhan US **\$34,261,371.00**, taasina waxa ay horseedday in aan si madax-banaan u xaqijiin waayo lacag ahaan in cadadkaasi yahay mid si xaqsoor leh loo go'aamiyay.

Turki ha ogaado in bulshada dalkani indhaha ku heysos, sida uu u maareeyo wadahadallada MoU-da ee uu riixaayo iyo heshiisyada dhaqaale ee uu ugu dambeeyo midka saliidda iyo gaaska Turkigu uga baarayo xeebaha dalka. Madaxda Somaalida waa og yihiin qarannimo wax la dhaafsadaa inaaney jirin, Turkina aqbaleyn inaan dalkiisa u guurnno marka aan keenna weynno. Hakan (waa wasiirka dibadda ee Tukiye) farriinta shacbkani diraayo waxa weeye, culeys ha nagu saarin go'aaan dhaawacaya sharafka iyo qarannimada dalkan iyo dadkan aadka ugu heelan walaaalt-innimada shacabka iyo dowladda Turki, safiir Alber Aktas-na isnaa waa u farriin.

**WQ: Faarax D. Soomane**

# SHAARCIGA TACLIINTA SARE TALA KU-MAANAAN YEELAN!



Guddoomiyaha jaamacadda Banaadir, Prof. Biday

**W**axbarashada Soomaaliya waxay soo martay heerar kala duwan. Waaan qormadaan ku soo bandhigi doonaa marxaladihi kala duwanaa ee waxabarashada dalku soo martay, iyadoo aan u kala qaadi doonno xilliyo kala duwan kuwaas oo kala ah:

- 1- Marxaladdii Isticmaarka ka hor.
- 2- Marxaladii Isticmaarka.
- 3- Xukuumadihi Rayidka.
- 4- Xukuumaddii Kacaanka.
- 5- Marxaladda Burburka.

## 1 - W A X B A R A S H A D A SOOMAALIYA ISTICMAARKA KA HOR.

### Tacliinta Düninga

Marxaladdaan waxbarashada dalka ka jirtay waxay ahayd tacliinta dünta. Marka ardaygu gaaro xilliga uu wax karo ayaa markiiba la geyn jirey dugsi quraan si uu yaraantiisa u xifdiyo quraanka kariimka, barashada quraanka oo ah ilaa maanta ah mid ka jirta deegaannada

dalka oo dhan waa mid eeb-be ku mannaystay bulshada soomaaliyeed ee muslimka ah, waana tilmaanta koowaad ee lagu garto dadka soomaaliyeed ah oo goobo caalamka islaamka ka mid ah looga yaqaann "Dadkii Quraanka".

Macallinka quraanka bulshada dhexdeeda wuxuu ku leeyahay ixtiraam iyo qaddarin gaar ah iyadoo goobaha miyiga loo xoola gooyo noloshiisana meel la saaro. Dhulka beeralaeysda

ahna waxaa loo diyaariyaa ciidan beertiisa fala. waxaa jirta in marka hore oo macallinka ardayga loo dhiibayo waalidku uu u bandhigayo macallinka una muujinayo in ardaygaas uu la doonayo barashada quuraanka kuna oranayo: **"Macallinow lafta aniga ayaa leh hilib-kana adiga"** oo macnaheedu yahay in macallinku canaanta waxbaridda aysan ka reebbanayn waana sida uu sharcigu qabo.

Barashada quraanka kariimka waxaa laga dhaxlay xikmado

fara badan oo ay ka mid tahay mid tilmaamaysa dhawr waxyaabood oo uu ku najixi karo ardaygu kuna baran karoquraanka si sahlan, waxayna xikmaddu leedahay (Quraan waxaa lagu bartaa haddii la helo Macallin qaari ah, Arday qaylo dheer iyo waalid wax quura). Tani macnaheedu waxa uu yahay in xilka macallinka saaran oo laga doonayo yahay inuu ardayga waxbaro, tan ardayga oo ah inuu dadaalo iyo midda waalidka oo ah inuu daryeelo ardayga iyo macallinka, waxaa kaloo laga dhadhansan karaa xik-

maddaan in loo baahan yahay inay isku xirmaan xiriir joogta ahna yeeshaan ardayga, macallinka iyo waalidkaba si loo xaqiijiyo hadafka ah waxbarid-da dhallaanka.

Marka ardaygu dhammeeyo quraanka isla mar ahaantaana uu naqtuumo waxaa uu u xeraysan jirey xarumaha cilmiga diinta laga raacdoo kuwaas oo u badnaa dhul xeebeedyada waxaana ka mid ahaa goobahaas Seylac, War sheekh, Marka iyo Banaadir. Waxaa kaloo ka mid ahaa xarumaha cilmiga caanka



**W. waxbarashada, Faarax Cabdulqadir (3aad, bidig) iyo Dr Biday (2aad-midig)**

ku ahaa Harar iyo Baardheere. Xarumahaan Cilmiga waxay soo saareen culomo fara badan oo ka qayb qaataf faafinta diinta islaamka.

## 1 - WAXBARASHADA SOOMAALIYA XILLIGII ISTIC-MAARKA

Gumeystihii reer yurub ee qaysaday dalka waxay billaabteen inay aasaasaan dugsiyo raacsan kaniisadaha kala madaahibta duwan oo ay wateen. Dugsiyadaan bulshada Soomaaliyeed kuma aysan degdegin iyadoo cuqdad inta badan ay ka qabto ayaa haddana waxaa jiray in dadka saboolka ah carruurtooda iyo kuwa aan dadka lahayna ay dugsiyadaas hoy u noqdeen.

Waxbarashada xilligaan ma ahayn mid tayeysan, ujeeddaa gumeystuhuna waxay ahayd oo keliya inuu soo saaro kuwo isaga u adeega, aqoonta uu barayna aysan dhaafsiisnayn Turjubaannimo, Karraaninimo, Cunto karin, Waardiye, Nadiifiyeye iwm.

Xornimada ka hor waxaa kaloo jirey dadaallo gaar ah oo ay sameeyeen aqoonyahanno soomaaliyeed oo dibadda wax ku soo bartay isla mar ahaantaana ahaa aabbayaashii waxbarshada casriga ah kuwaas oo kala ahaa Max'uud Axmed Cali oo waqooyiga dalka ku baahiyey tacliinta casriga iyo Macallin Jaamac Bilaal oo kaalin mug leh ka soo qaataf dhidib u taagidda tacliinta casriga ee koo-

furta dalka. Waxaa kaloo xusid mudan xilligaan inay kaalin firfircoo ay lahaayeen bicsadii Azhar oo markii ugu horreeyey dalka soo gaartay sanadkii 1952kii isla mar ahaantaana Machadkii ugu horreeyey ka furay Muqdisho sanadkii 1959kii, sidoo kale ayey dhiggiisa ka fureen Burco 1960kii.

## 2 - WAXBARASHADA SOOMAALIYA XILLIGII XUKUUMADAH RAYIDKA

Xornimada ka dib waxaa jiray dugsiyo ay dawladdu maamusho oo ay ka mid yihiin (Scoula Media) oo ku yaallay Muqdisho sidoo kale ayey jireen Machadka Daraasaadka Islaamka, Machadka Macallimiinta iyo dugsiyo farsamo oo lagu baran jirey Ganacsiga, Wershadaha iyo Culunta Badda.

Xilligaan dugsiyada sare ee Jamhuuriyadda ka jiray waxaa lagu qiyaasay ilaa 25 dugsi oo luuqadaha wax lagu bartana ahaayeen Ingiris, Talyaanii iyo Carabi, ma aysan jirin Jaamacad dalka oo dhan sidaas darteed ayey ardayda soomaaliyeed dibadda waxbarasho u aadi jireen. Sanad dugsiyedkii 1962/63 ardayda soomaaliyeed ee dalka dibaddiisa wax ku baranayey waxay gaarayeen 1500 oo arday, intooda badanna waxay ku sugnaayeen dalalka Masar, Talyaaniga iyo Ruushka. Tani markii dambe waxaa laga dhaxlay kala duwanaansho dhanka aqoonta iyo dhaqanka

ah, waxayna ka dhex muuqatay xisbigii leegada oo markaas talada dalka hayey.

## WAXBARASHADA SOOMAALIYA XILLIGII KACAANKA.

Markii ciidamadu la wareegeen talada dalka 1969kii waxaa isbeddel ku dhacay nidaamkii tacliinta ee dalka maadaama mabaadi' cusub oo dalku ku dhaqmayo lagu dhawaqaqay. Xilligaan tallaabta uu kacaanku u qaaday dhanka tacliinta waxaan u kala qaadanaynaa mid uu ku ammaanaa meelaha qarkood halka lagu dhaliilayo meelaha qaar.

### B- Dhanka Ammaanta:

- 1- Baahinta tirada dugsiyada gobollada iyo degmooyinka dalka. Marxaladdaan waxaa dalka oo dhan la gaarsiyyey dugsiyada aasaasiga, si isla mar qura gobollada iyo degmooyinka oo idili isula jaanqadaan oo tacliin midaysan loo helo.
- 2- Qoridda afka soomaaliga wuxuu mideeyey manhajka waxbarashada marxaladaha aasaasiga ee dalka oo dhan.
- 3- Waxbarashada xilligaas jirtay oo ahayd lacag la'aan waxay suuragelisay inay waxbarashada u sinnaadaan qaybaha bulshada hodan iyo saboolba.
- 4- Soomaaliyeynta manhajka

waxbarashada ee marxa-ladda aasaasiga ah wuxuu sahlay waxyaabo fara badan oo dahoonaan iyo in la isu soo dhaweeyo kala duwanaanshihi luuqadaha waxbarashada.

- 5- Ballaarintii Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed (JUS) oo soo saartay aqoon-yahanno badan oo kala takhasusyo duwan isla mar ahaantaana dalka iyo dadka soomaaliyeed wax taray.
- 6- La dagaallanka jahliga. Wuxaana tusaale wanaagsan ugu filan Ololihii Horumarinta Reer Miyiga ee lagu cirib tirayey jahliga oo uu ugu horreeyo wax qoris iyo aqrin la'aanta, taas oo ciribteeda la mahdiyey.

#### **T- Dhanka Dhaliiشا:**

- 1- Tacliinta oo ku soo koobatay gacanta Dawladda.
- 2- Faafidda laaluushka, qaraaboo külka iyo kooxaysiga oo nidaamka waxbarasho xilliyadii cimriga kacaanka ugu dambaysay ku batay.
- 3- Fasaadka akhlaaqeed oo ka muuqanayey hay'adaha waxbarashada ee dalka.
- 4- Dhoofka aqoon-yahannadu dalka uga hayaamayeen.
- 5- Daryeel la'aanta Macallinka soomaaliyeed.
- 6- Dabbaqidda Nidaamka waxbarasho ee Markisam-

ka.

- 7- Soo saaridda go'aankii shaqada qaranka ee labada sano, taas oo dhalisay in ardayga maskaxdiisa ka mayranto wixii uu soo bartay.

#### **WAXBARASHADA SOOMAA-LIYA BURBURKA KA DIB**

Sida ay u jirtay xilliyadii hore dhaliil iyo ammaan nidaamya-dii waxbarasho ee xilligaan ka horreeyey ayuu nidaamka waxbarasho ee hadda jira uu leeyahay dhan san iyo mid u baahan in la saxo.

#### **B- Dhanka Ammaanta:**

- 1- Hay'adaha gaarka loo leeyahay oo gacanta ku hayo waxbarashada dalka.
- 2- Tartan wanaagsan oo u dhaxeeya hay'adaha waxbarashada gacanta ku hayo si loo helo waxbarasho tayeysan.
- 3- Kororka jaamacadaha gaarka loo leeyahay.
- 4- Deeqaha waxbarasha-da dibadda ee ardayda soomaaliyeed oo aad uga badan xilliyadii hore.
- 5- Wacyiga diüniga ee ardayda maanta oo aad uga sareeya kuwii hore.

#### **T- Dhanka Dhaliiشا:**

- 1- Burburka baahsan ee soo gaaray hay'adihii waxbarashada sida Wasaaraddii Waxbarashada iyo midii Ta-

cliinta Sare.

- 2- Maqnaanshaha kaalintii xukuumadda ee ku aaddanaa kormeerka hay'adaha waxbarashada.
- 3- Macallimiinta tababaran oo aad u yar.
- 4- Kala duwanaanshaha dhinaca manaahijta dugsiyada shaqeeya.
- 5- Waddaniyadda iyo aqoonta bi'iada uu ardaygu ku dhex nool yahay oo aad ugu yar ardayda maanta.

#### **Doodaha Jaamacadaha**

Doodda jaamacadaha dalka iyo wasaaradda waxbarashada kuma qotonto shuruuc iyo wadashaqeyn, mana jirto sabab ay jaamacaduhu u düiendaan nidaam iyo kala dambeyn iyo dowladnimo, balse xaaladdan waxaa sal u ah dano is diidan ama (Conflict of interest).

- Ka warraama haddii milkiile bangi laga dhigo, gudoomiyaha bangiga dhexe, ama milkiile shirkad Isgaarsiin laga dhigo wasiirka Isgaarsiinta, shuruucdii lagu dhaqi lahaana uu isaga sameeyo, fursadihi iyo xogtii dowladana uu isaga haayo. Xaaladda waxbarashada maanta heysata waa taas oo kale.
- Bahda waxbarashada waa dad ay aqoon celiso oo waxbadan ka xishooda.

Laba sano oo la soo dhaafay waxaan u dulqaadanay oo ah in awoodda dowladda loo isticmaalayay in lagu dumiyu hay'adaha waxbarashada ee waddanka waxay ka badan yihin wixii aan u dulqaadanay 30 kii sano ee burburka.

- Dowlad la'aan, hoggaamiye kooxeed, maxkamado, dowlado KMG intaba waxbarashada waa socotay, marna wax siyaasad ah kuma milmin, maanta waxaa la soo dhxgeliyey siyaasad maanta oo ay dowladi jirto in la dumiyu oo jaamacdo dalka u soo shaqeeeyey tan iyo burburkii dalkeenna ku habsaday, in kuwo masuuliyiin dowladeed leeyihin kalliya la soo reebo waa nasiib darro. Waana u jeeddada loo socdo
- Dowladaha iyo awoodda siyaasadda waa meerto oo ma aha wax joogta ah, sidaas

darteed ayey bahda waxbarashadu u door bidaan inaysan ku milmin siyaasadaha isdiidan, si aysan u saameynin mustaqbalka dhalinta Soomaaliyeed ee aan wax bareyno. 12 sano oo school ah 4-6 sano oo jaamacad ah ayey tahay inaan hubino si uusan u dayacmin mustaqbalka carruurta. Marka howlaha ay mas'uuliyinta huwan magaca dowladni-mo uu ku kacaayo ee ah ka faa'deysashada awoodda dowladda isagoo ugu daneynayo shirkado uu wax ka leeyahay waxay barri saameyneysaa hay'adahaas laftooda, taasoo halis gelineyso kumannaan carruur ah oo ah hadda wax ka barta hay'adahaas. Sharciga na la kama tala gelin.

#### Waxa diyaariyey:

#### Prof. Maxamed Maxamuud Xasan (Biday)



ASU\105\2024

Date: 30/09/2024

#### Mawqifka Midowga Jaamacadaha Soomaaliyeed ee Ku Aadan Hindise Sharciyeedka Tacliinta Sare ee Baarlamaanka Horyaala

Arrimaha aasaasiga ah ee Midowga Jaamacadaha Soomaaliyeed ay ku doodayaan waxaa ka mid ah:

1) **Madax bannaanida Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare:**

Guddiga waa in uu noqdaa mid madax bannaanoo doosturi ah. Inta arrintasaga lagu sameynayo, guddiga waa in uu noqdaa mid shaqooyinka caadiga ah u gudan karo si madax bannaan. Sida ruqsad bixinta iyo kala noqoshada Jaamacadaha, diyaarinta xeeridaamiyyaasha iyo xeer hoosaadyada khuseeya shaqada guddiga.

Sida ku cad meeloo badan oo ka mid ah hindise sharciyeedka tacliinta sare ee ay Wasaaraddu u gudbisay Baarlamaanka guddigu malaha madax bannaanii guud iyo madax bannaan shaqo mid koohna, sida ku cad (**Qodoboda 4aad, 10aad, 12aad, 20aad iyo 21aad ee Hindise Sharciyeedka Tacliinta Sare**)

2) **Kala cadaynta shaqooyinka Agaasinka Tacliinta Sare iyo Guddiga Qaran ee Tacliinta Sare:**

Si looga fagaado isqabqabsi, Guddigana uu shaqadiisu u qabsado si hufan, waxaa waajib ah, in si cad loo kala sooco shaqooyinka agaasinka tacliinta sare iyo guddiga qaran ee tacliinta sare.

Sida ku qoran hindise sharciyeedka tacliinta sare ee ay wasaraaddu u gudbisay Baarlamaanka shaqooyinka labada hay'adood way isku miljan yihin, sida ku cad (**Qodoboda 7aad iyo 19aad ee Hindise Sharciyeedka Tacliinta Sare**)

3) **Mataladda iyo Magacaabista Xubnaha Guiddiga:**

Si loo helo guddi qaran oo lawada ogol yahay, shaqadiisana u gudan kara si hufan, waa in baahda tacliinta sare ee dalka ay helaan mudhaan iyo mataalaad gaar ah oo la xariita dhismaha guddiga, maaqadaha baahda tacliinta sare iyo laf-dhabar u yihin hormarinta tacliinta sare ee dalka, aqoonetidii iyo khibradeedina ay leeyihin.

Hadaba, waxaan soo jeddinayaa in xubnaha guddiga qaran ee tacliinta sare ay *si siman oga kala yimaadaan soona magacaawdaan saamileyda kala duwan ee kala ah:*

- Wasaaradda Waxbarashada Hiddaha ayio Tacliinta Sare
- Midowga Jaamacadaha Soomaaliyeed
- Bulshada Rayidka ah

Hindise sharciyeedka dhexdiisa laguma cadeynin qoondada baahda tacliinta sare iyo xittaa jihooiyinka kale ee ay ka kala imaamayaan xubnaha guddiga, (**Qodobka 9aad**) balse hindise sharciyeedka waxaa lagu xusay in wasiirkuu uu soxi xutli doono xubnaha guddiga, arintaasi oo ah hindise sharciyeedka in gudiga uu noqdo guddi qaran oo loo dhanyahay.

4) **Ilaalinta Mabaadi'da Cadbaalada Bulshada iyo ka Hortagiidda in lagu tagrifalo hantida**

**Qaran:**

Maadaama hantidda dowlada ay tahay hanti bulshada Soomaaliyeed wada leedahay, markii ay dowlada ay rabti in ay furti farac kamid ah Jaamacadde ummada Soomaaliyeed ama Jaamacad dowladeed oo cusub, qaraarka arrintasii lagu ogolaanayo waa in uu noqdaa xeer baarlamaan si loo ilaaliyo cadaalada bulshada, loona xaqiijijo baahida dhabta ah ee xiligaasi loo qabo tacliin sare.

Hindise sharciyeedka waxaa ku cad in uu wasiirkaa leeyahay awood lagu furi karo jaamacad dowladeed, taasi oo keeni kartaa in lagu tagrifalo hantida qaran ama loo isticmaalo arimo siyasadeed (**Qodobka 23aad**)

5) **Xaqiijinta sharci ahaanaha jirintaanka Midowga/Ururka Jaamacadaha Soomaaliyeed:**

Si marwaliba loo xaqiijijo iskaashiga, u qareemida iyo ilaaalinta xaqiuquda hay'adaha tacliinta sare ee dalka **Jaamacadaha** ee dalka, waxaa lagamaa maarmaha ah in sharciya tacliinta sare ee dalka, lagu cadeeyo jirintaanka Midowga Jaamacadaha Soomaaliyeed, si loo dhiirigeliyo hormarka, madax bannaanida iyo xuriyada tacliinta sare ee dalka.

Hindise sharciyeedka tacliinta sare ee hadda horyaala Baarlamaanka laguma xusin in Jaamacadaha dalka ay yeeshaa/yeelan karaan Midow/Urur ka shaqeyaa ama u qareema tacliinta sare ee dalka, taasina waxay muujinayaa dhiirigelin la'aanta iskaashiga hayadaha tacliinta sare ee dalka.



# Maaha mid u xidhan wiilasha, bal waa loo siman yahay!

**E**ng. Sucaad Jamac Cab-dullaahi iyo Eng. Caasha Cali Mo'calim waa laba gabdhood oo ka qallin jebiyey jaamacadaha dalka, kuna xeeldheeraaday cilmiga handasada iyo dhismaha, waqtiyadii hore ahaan jidhay garoon aan wiilashada lagula tartamin. Wallow weli ay wiilashu dhinac tirade kaga horreyaan gabdha-ha, haddana tirade gabdhaha ee isu diiwaan geliya cilmigan aad bey guyaalkan dambe u kordheysaan.

Eng Sucaad ayaa le "dambe cil-migani ma ahaanayo mid idii gooniya wiilalow ee tartan diyaar u ahaada". Sidoo kale, Eng. Caasha Cali Mo'allim oo iyana la hadashay Majallada Warsan waxay sheegtay in markii ay isu diiwaan gelineysay kulliyada handasada iyo dhismaha waa-lidka iyo saaxibadu waxay la-haayeen "kolba dhex baad uga tegi doontaaye maad culuunta fudud ee gabdhaha loogu tala galay doonato, markaan qal-in-jebiyeyna waa la rumeysan waayey, ileyn dadkeennu waxay iska aamineen in gabdhaha looguba talagelin shaqooyinka adag iyo inaaney la socon qalabka casrigaa ee howl walba sahla".

Wiilalow Sucaad iyo Caasha waxay dirayaan farriintan:

**"Dambe ma ahaan doonto mihn nad wiilsha u gaara, waana loo tartami doonaa la-maha cilmi oo dhan".**



Eng. Suad Jama A co-founder of the Society of Somali Women Engineers (SSWE) holds a master's degree in Transportation Engineering from Gazi University, Turkey, and a bachelor's degree in civil engineering. Currently, she serves as the Chief Engineering Officer at Hadiid Industries Group in Mogadishu. Also, A 2023 MILEAD Fellow for Africa's Most Exceptional Young Women Leaders.



Engineer Aisha Ali Moalim is the co-founder and CEO of Bilan Home Service Construction Company and serves as the Mogadishu Regional Director for the Society of Somali Women Engineers (SSWE). I hold a Bachelor's degree in Civil Engineering from Hormuud University and a Master's in Public Administration from Alpha University and am currently advancing my studies in Architecture and Civil Engineering through Harvard via Alpha Academy. As a facilitator for the U.S. Embassy in Mogadishu through Irise Hub, I am dedicated to empowering young women to pursue careers in engineering and technical fields and hope to begin lecturing at Hormuud University soon.

# LET'S GET CLOSER

## Phone

+252 770975408

## Address

Aaran Plaza, Taleex  
Makkah Almukarramah Av 3

## Social Media

@SomaliWomenEngineers

@SSWE\_\_



# ABOUT US



At the Society of Somali Women Engineers (SSWE), we are dedicated to empowering Somali women in engineering and technology fields. Founded with the vision of creating a supportive and inclusive community, SSWE strives to provide educational opportunities, mentorship programs, professional resources, and research initiatives to help Somali women thrive in the world of STEM (Science, Technology, Engineering, and Mathematics). With a focus on fostering innovation, leadership, and gender equality, SSWE aims to be a catalyst for positive change in both local communities and the broader engineering industry.

# MISSION

Our mission at SSWE is to empower Somali women in engineering and technology through education, mentorship, community engagement, and research. By providing access to resources, opportunities, and support networks, we aim to equip Somali women with the skills, confidence, and connections they need to succeed in their careers, make meaningful contributions to society, and advance knowledge in their respective fields. We are committed to promoting diversity, equity, and inclusion in STEM fields and inspiring the next generation of female engineers and leaders.

# VISION

At SSWE, we envision a future where Somali women are leading contributors and decision-makers in engineering and technology, driving innovation, shaping the future of their communities, and contributing to global advancements through research. We aspire to create a world where all women have equal opportunities to pursue their passions and achieve their full potential in STEM fields, regardless of background or circumstances. Through our collective efforts, we strive to build a more diverse, equitable, and inclusive engineering industry that reflects the richness of our global community and addresses pressing societal challenges through impactful research.

# WHAT WE DO

**Empowerment Programs:** We provide scholarships, workshops, and resources to support Somali women in engineering and technology careers.

**Consulting Services:** Providing expertise in engineering disciplines, project management, and innovative solutions.

**Research:** Conducting research in engineering and technology, contributing to advancements in the field.

**Mentorship:** Pairing aspiring engineers with experienced professionals for guidance and career development.

**Advocacy:** Championing gender diversity and equality in STEM, raising awareness and promoting opportunities.

**Skill Development:** Offering workshops, training, and leadership programs to empower women to excel in their fields.

**Career Support:** Offering consulting services to assist engineers in navigating career paths and achieving professional goals.

**Internship Opportunities:** Connecting students with internships in professional sectors for hands-on experience.

**Community Engagement:** Organizing events and seminars to connect women engineers with industry leaders and peers.

**EMPOWERING THROUGH  
TECHNOLOGY AND INNOVATION**

**JOIN US IN BUILDING A  
BRIGHTER FUTURE  
TOGETHER**

# GET INVOLVED

There are many ways you can get involved with SSWE:

- **Volunteer:** Contribute your time and expertise by volunteering for events, workshops, or mentorship programs.

- **Become a Member:** If you are a Somali Women Engineer Join SSWE as a member to access exclusive resources, networking opportunities, and member-only events.

- **Support Us:** Help us further our initiatives by supporting SSWE through donations or sponsorships.



Looking to update a single room or completely remodel your home or office?



If you have plant to update a single room or completely remodel your home, our team is dedicated to assisting you in achieving your renovation goals.

We work  
**24h/weak**

Contact us today to get started!

**0616978307**  
**0615097482**

#### How Our Team Works?



#### More Information

[info@bilan.so](mailto:info@bilan.so)

[www.bilan.so](http://www.bilan.so)

#### Bilan Home Repair Services

Aran Plasa Tower, Next to hayatmarket

[www.bilan.so](http://www.bilan.so)

## Transforming Your House Into A Dream House



**3**  
Flooring & Tiling Installation  
We offer a range of flooring installation services, including hardwood, tile, laminate, and carpet, to help update the look and feel of



**4**  
Painting  
We can help transform your outdated kitchen or bathroom into a modern, functional space that meets your specific needs and preferences.



**5**  
Waterproof and Siding  
We offer waterproof installation services to help protect the underlying materials, such as or concrete, from water damage, leakage, and structural deterioration.



**6**  
Fixing W.machine & refrigerator  
"Facing appliance issues? Count on us for top-notch washing machine and refrigerator service. Quick, skilled, and affordable solutions for your convenience!"

#### About Us

At Bilan Home Repair Service, we are committed to transforming houses into dream homes. With over a decade of experience, we specialize in a wide range of home improvement services, including carpentry, plumbing, electrical work, painting, and more.

Our mission is to deliver exceptional craftsmanship, personalized solutions, and competitive pricing to meet your specific needs and budget. We value open communication, ensuring that your vision guides every step of the process.



## Our Services



### 1 Kitchen and Bathroom Renovations

We can help transform your outdated kitchen or bathroom into a modern, functional space that meets your specific needs and preferences.



### 2 fixing Plumbing & Electrical

"Need plumbing and electrical service? Our expert team ensures efficient and safe solutions for your home's essential systems. Trust us for reliable repairs and installations!"

# Muxuu Imaaraadku Ka Rabaa Geeska Afrika ....



**Cid dhigahan aqrisay Somaalida ma ku jidhaa? Waa dhigane u baahan in dadka geeska Afrika baalashiiisa rogrogaan.**

**W**ax ku dhow dhawr iyo tobankii sannadood ee u dambeeyay waxa aad u kordhaysay saameynta iyo galaangalka uu Imaaraadku ku yeelanayay Geeska Afrika. Si ay nnu arrintan u fahanno waa in ay nnu milicsi kooban dib ugu sameynaa dawladda Imaaraadka, gobollada ay dhacdo, dhacdooyinka ka taagan, xiisada ka jira iyo maslaxadaha ay ilaas-hanayso ee ay u taagantahay, si gaar ahna kuwa ka khuseeya gobolkan Geeska Afrika ee aadka u xiisadaha badan.

Imaaraadku waa mid ka mid ah dawladihii Khalijka Carabta

ee qaatay xorriyadda 1971kii. Ingiriisku sagaal Sheektooyo (Sheikhdoms) oo uu heshiis kula jirey ayaa uu dhammaadkii lixdannadii bilaabay in uu xorriyat siyo, in kasta oo ay cabsi shisheeye dareemayeen sida liraan oo ay rabeen in uu la sii joog Ingiriisku, haddana ma ay suurogalin. Waxa ay bilaabeen in ay isbahaysi federayshan Carbeed ah sameystaan iyaga oo sagaal imaraadood ah, se waxa ay arrintaasi dhicisowday markii Qadar iyo Baxrayn goonni isu taageen. Kadibna wixii soo hadhay oo toddobo ah; Fujayra, Abu Dubay, Shar-

ja, Um Al-Quwayn, Dubay iyo Raas Al-Khayma ayaa isu tagey oo aasaasay dawladda Isutaga Imaaraadka Carabta (United Arab Emirates).

Imaaraadku waa waddan dha-ca Bariga Dhexe (Aasiya Gal-beed) oo xuduud la leh Gacanka Beershiya iyo Gacanka Cummaan una dhexeysa waddanka Cummaan iyo Sucundi Carabiya. Waxa uu dhaca marinka aadka istiraatiijiga u ah ee saliidda adduunku mar-to waa Haramuus e (Strait of Hormuz). Waa waddan sida oo kale dhaca marinka taariikhiga ah Silk Road (marin-ganacsiy-



Berbera port - Howl badan kama socoto

eedka Yurub-Aasiya – Eurasian trade route) ee soo bilaabmay qarnigii labaad ee Nebi Ciise ka hor illaa badhtamihii qarnigii shan iyo tobnaad, kaas oo isku xidha dunida Barigeeda iyo Galbeedkeeda, marinkisa badeed (Maritime route) oo soo gaadha marinka Haramuus, jasiirad-u-ekaha Carbeed, Indyaanka, Gacanka Beershiyaanka illaa Mombaasa iyo Geeska Afrika.

Waa waddanka labaad/saddex-aad ee ugu dhaqaalah weyn Bariga Dhexe oo leh GDP lagu qiyaaso \$500 bilyan (2021-23). Waa uu aad ugu tiirsanyahay batroolka iyo gaasta dabiiciga ah, wax ka badan 77% iyo 80% dhaqaalihu waxa uu ku tiirsanyahay dhoofinta saliidda qaydiin (2008/2011). In kasta oo ay beryahan dambe bilaa-been kala duwidda dhaqaalah (Economic diversification) sida; dalxiiska iyo ilo kale, ayna hormuud ka noqdeen dhaqdhaaqayada isbeddelka cimillada, iwm. Waxa ay horraantii siddeetannadii bilaabeen kacdoon dhaqaale iyo horumarinta dekedaha. Waa ay xilligaas

dhiseen dekenna Rashiid iyo aagga dhaqaalah xorta ah ee Jabal Cali (Jebel Ali Free Economic Zone), iyo sida oo kale gegida dayuuraha caalamiga ah ee Dubay, kuwaas oo markii dambe fure caalami ah u noqday maraakiib-ku-xidhashada, gaadiidka iyo loojistikada, sida shirkadda Dubai Port World (DP World), diyaaradda Emirates iyo Dubai National Air Travel Agency (DNATA).

Imaraadku waxa uu leeyahay wax ku dhow laba iyo toban dekedood oo aad u horumarsan, si weyn loo qodey, loo casriyeeyay, caalamkana kaga jira

kaalin muhiima dhanka isku-socodiisa dhaqaale iyo gaadiidba. Waa ugu horreysa dekenna Jabal Cali oo Dubay ku taal oo la dhisay dhammaadki toddobaatannadii, waana ta sagaalaad ee ugu mashquulka badan caalamka, mar kalena waa ta ugu weyn uguna mashquulka badan Bariga Dhexe oo dhan.

Waxa kale oo uu Imaaraadku bilaabay laba hal-abuur oo dhankiisa horumarka dhaqaalah iyo la macaamilka caalamka kaalin weyn ka qaataay, midi waa xarunta maaliyadda caalamiga ah ee Dubay (Dubai International Finance Center) iyo suuqa caalamiga ah ee Abu Dubay (Abu Dhabi Global Market); iyo sida oo kale dhismaha aagagga xorta ah ee dhaqaalah (Free economic zones) oo fara badan kuwaas oo bixiya adeegyo kala duwan oo ka madaxbannaan shariyada gudaha dalka lagu dhaqo (Mainland jurisdiction) oo dhammaantood ka qeyb noqday soo juidashada maalgelino



Kismaayo Port - Iyana u cadilan DPW

Ka yimid Bogga 23

caalami ah oo dibadeed oo kor u qaaday korriinkiisa dhaqaale iyo saameytiisaba. Imaaraadku waa waddanka muhiimaddaas dhuleed iyo juquraafi leh oo ay u raacday horumar iyo dhaqaale baaxad leh. Haddaba sidee nimcadan qaab kale loogu isticmaali karaa, loona ilaalin karaa waa halka ay ka dhalanayso wayddiinta kore ka warcelinteedu.

### Maslaxadaha Qaran ee Imaaraadka

Guud ahaan waddamadu waxa ay leeyihii maslaxado qaran (National interests) oo ay u mudantahay 'primary interests – maslaxadaha aasaasi-ga ah' kuwaas oo khuseeya ilaalinta jiritaanka dawladda, dhaqan-dhaqaalaheeda iyo ahaanshaheeda. Waana salka hoose ee maslaxadaha klena lagu dul dhiso. Imaaraadka waxa maslaxad qaran oo aasaasiya u ah ilaalinta dawladda iyo awoodaheeda, dawladduna waa nidaamkan/rajiimka hadda dhisan ee Sheekhtooyada ah oo laga ilaaliyo in isbeddel ku dhaco, jamhuuriyad ah ama Islaami ah, waa halkan meesha ay salka ku hayso in liraan aad looga taxaddiro oo lala colloobay maddaama ay faafiso kacdoonno boqortooyoyinka lagu tuuro, gaar ahaan kuwa Khalijka Carabta iyo sida oo kale la saaxiibidda Maraykanka iyo Galbeedka.

Dhan kale, Imaaraadku maadd-

aama uu noqday horyaalka loojistikada iyo adeegyada marinnada badeed ee dunida waxa uu maslaxaddiisa ku saleeyay in uu dammaanad qaado isku socod ka soo bilowda marinka Haramuus ee Gacanka Beershiya illaa marinka Baabul Mandab ee Gacanka Cadmeed illaa Baddacas.

Goobahani sida oo kale waa marinbiyoodyo aad u yar baaxad ahaan oo ay cidhifyada dhulalku soo gaadhaan (Chokepoints) oo si fudud loo xannibi karo, ayna daruuri tahay in bedqabkooda loo sugo si buuxda. Markaa waxa ay u noqotay in uu muhiimad iyo mudnaan istiraatijiyyadeed ka dhigto sugista amniga goobahan ku yaalla Baddacas, Gacanka Cadmeed iyo Gacanka Beershiya oo uu xataa isku dayo raadinta waddamo isaga la jaal ah (like-minded governments).



Bosaso port - waa cadilan

Waxa intaa raacday in adeegyada iyo ganacsiga uu Imaaraadku hormuudka ka yahay ay Geeska iyo Bariga Afrikana u noqdeen albaabki uu ka geli lahaa Afrikada weyn, uguna soo xigay dhinkiiisa. Markaa waa uu ku qasbanyahay in uu mudnaan weyn siyo marka dhinacyo badan laga eego gobolka.

### Isbeddelka Siyaasadda Dibadda

Waddamadu marka ay awood ahaan yaryihii ama ay cusub yihiin waxa ay isku dayaan in ay raadsadaan dawlado waaweyn oo ay isku ilaaliyaan (Survival) ama ay hoosjoogaan si ay danahooda uga gaadhaan, sidaa darteed Imaaraadku kolki uu tabaryaraa waxa uu aad ugu xidhmay oo la saaxiibay dhanka Galbeedka iyo Maraykanka, isaga oo heshiisyo iskaashi millatari ah la yeeshay, hub iyo tababar millaterina aad uga helay, isaga oo badankana qeyb ka noqday hawlgallo fara badan sida; kii UNISOM Soomaaliya 1993kii, hawlgalkii Maraykanka ee Kosovo, kii Miino-saaristii Lubnaan, faragelin-tii Afgaanistaan iyo Ciraaq ee 2001/2003, ijk.

## Gu'gii Carabta

2011kii iyo xilliyadii ka dambeeyay ee uu bilowday Gu'gii Carabtu waxa uu Imaaraadku u arkay bilowga isbeddel ku socda mandaqadda siiba bulshooyinka Carabta ee uu ka midka yahay ayna tahay in uu wax ka beddelo adduun'arag-giisa dibadeed, taas oo halis badan ay uga muuqatay dawla-daha badan ee la riday ee qarkood ay dhacaan Baddacas oo isaga muhiim u ahayd gannacsigiisa. Mar kalena dawala-daha qaar sida Masar oo ay doorashadii ku guulaysteen ururka Ikhwaanul Muslimiinku oo Imaraadku u arko in uu halis ku yahay jiritaankiisa dawladni-mo (Existential threat), dabcan waa nidaamka boqortooyada e, maaddama uu kacdoon Is-laami ah ku keeni karo gudaha Imaaraadka. Halka dhanka Qadar oo loollan adag kala dhxeeyana ay taageerto ururkan oo xidhiidh wacanna ka dhxeeyeo. Waa markan xilliga uu Imaaraadku bilaabay in uu ka fekero wax dhaafsiisan xudu-udaha dhow ee ku haraareysan, iskuna dayo in uu saameyntiisa ballaadhiyo dhanka Geeska iyo Afrikada kale. Waxa ay qaateen fikrad odhanaysa nabad ma ahaan kartid haddii jaarkaagu dagaal ku jiro, ama si kale had-di loo dhigo xiisado halis kugu noqon kara ay ka taaganyihii. Waana macruuf dhanka xidhi-idh caalamiga ah in xasillooni-da mandaqadda aad dhacdo iyo xiisadaheeduba ay saameyn

weyn kugu leeyihiin, sida haddii ay diktaatoorro xasilloon yihiin oo ah ta uu Imaaraadku had iyo jeeraale raadiyo (Authoritarian stability) ama haddii mushkilado ka qarxaan in aad jilayaasha qaar xukunto, iwm.

## Siyaasad Faragelineed

Isaga oo Imaaraadku hore qeyb uga ahaa faragelino ay xulafooyin hore lahaayeen, haddana xilligan isbeddelka, Imaaraadku isaga ayaa ka dhigtay faregelinta mid ka mid ah qalabyada siyaasaddiisa dibadeed (Foreign policy tools). Imaaraadku waxa uu qaataf siyaasad faragelin dibadeed ku saleysan (Interventionist foreign policy) oo ay u horreysay isaga oo qeyb ka ahaa faragelintii Maraykanka ee Liibya 2011kii, faragelintii Maraykanka ee Suuriya ee 2014kii, faragelintii Ruushka ee Suuriya ee 2015kii iyo tan hadda socota ee xulafada Sucuudigu faragelisay Yaman ee 2015kii.

Mar kale Imaaraadku waxa uu aad u farageliyay oo taageero muuqa-



**MBZ waxa uu burburiyey Yemen**

ta oo ballaadhan siiyay Jeneraal Xaftar xilligii dagaalkii labaad ee sokeeye ee Liibya uu qarxay 2014kii. Sida oo kale waxa uu taageere dhaqaale, wadashaqeyn iyo tababbarba siinayay jahbadihi kala duwan oo Suuriya ka dagaallamayay sida jahbaddii koonfurta (Southern Front – Jabhatul Junuubiya), xooggaga dimuqraadiga Suuriya oo Kurdi ah (Syrian Democratic Forces) iyo sida oo kale dhaqdhaqaqa berri ee Suuriya (Syria's Tomorrow Movement). Sida oo kale, xukuumaddii ka dhalatay Gu'gii Carabta ee loo doortay Maxamed Mursi 2012kii, waxa ay Imaaraadku ka jareen taageeradii maaddiga ahayd ee ay Masar siin jireen ka hor kacdoonka, laakiin waxa ay durbadiiba soo celiyeen markii uu Cabdel-Fatax Al-Sisi inqilaabay

Eeg Boggaa 26

Ka yimid Bogga 25

xukuumaddii la doortay ee Ma-sar 2013kii.

### **Amnesty: MBZ refuses to reply on our messages about brutal crimes in yemen**

### **Galaangalka Gacanka Cadmeed iyo Indiyaanka**

Hilaadihi 2008, 2009, 2010kii iyo wixii ka dambeeyay marin-ka Suwayska ee Baddacas iyo marinnda kale ee Indiyaanka iyo Gacanka Cadmeedba, Imaaraadku aad baa uu xoogga u saaray amnigooda, isaga oo qeyb ka noqday hawlgal-ladii budhcad-la-dirirka ee iyo kuwii argagixiso-la-dirirka ee Soomaaliya. Wuxuu taageero iyo tababbarba siyaa ciidanka maamulka Puntland ee Soomaaliya 'Puntland Marine Police Forces – PMPF' oo la dhisay 2010kii, loona yagleelay la dagaallanka budhcad-baddeeda, iwm.

Sida oo kale 2014kii ayaa ay Imaaraadku bilaabeen bar-naamij lagu tababbarayo ciid-amada Soomaaliya, iyaga oo muddo kadibana ka furay xarun tababbar ah oo ay ciidamada Imaaraadku ku tababbaraan komaandoosta Soomaaliya. Imaaraadku ciidamo fara badan ayaa uu u tababbari jirey Soomaaliya, wuxuu kale oo uu dhisay xarumo tababbar iyo cis-bitaaallaba, sida oo kalena waxa uu bixin jirey mushaharka ciidan lagu qiyasay 2,407. Wuxuu kale oo uu gawaadhi siin jirey ciidanka maamulka Jubaland

yo wasaaradda arrimaha guda-ha ee federaalka Soomaaliya. Laakiin waxaas oo dhan waa uu joojiyyat markii Abril 2018kii diyaaraddii sidday lacagta dhan \$9 milyan ah lagu qabtay Xamar iyo xiisaddii ka dhalatay, taas oo keentay in xukuumaddii Far-maajo ay erido saraakiishii iyo ciidankii Imaaraadka, xarumihi-inay xidho. In kasta oo badan-ka xidhiidhadii Imaaraadka iyo Soomaaliya ay xukuumaddan cusub ee Xasan Shiikh ay dib u soo celisay dhinacyo badan.

Xilliyadii 2014-2015 ee urur-ka Xuutiyiintu xukunka ka tu-ureen madaxweynihii Yaman ee ay caasimaddana gacanta ku dhigeen, horena ay u jireen ururka Alqaacidada Jasiiradda Carbeed (Al-Qaeda in Arabi-an Peninsula – AQAP) oo illaa 2009 firfircoona illaa hadda oo xilliyadii 2011kii kacdoon-nadii gu'ga Carabtu bilaab-meenna imaaraad goonni ah ku dhawaaqay, sida oo kalena soo ifbaxay ururkii Daacish ee Yaman, wuxuu ay Imaaraadka iyo dawladihii Khalijka u ahayd halis kale oo jaarka dhow iyo mandaqadda ka soo cusboonaataay.

Maaddaama oo la dareeemay saameynta ballaadhan ee koraysa ee liraan oo Xuutiyanta dhabar u ahayd iyo ururrada jihaadiyiinta oo saameyn xoog-gan ku yeelanaya Bariga dhewe ee u dhow, taas oo keentay in xulafo uu Sucuudigu hormuud ka ahaa oo Imaaraadkuna ku

jiro ay Yaman farageliso Maarij 2015kii, sida oo kalena la raadiyo xulafooyin dhaca Baddacas oo Suudaan iyo Eritrea u hor-reeyeen, taas oo ay September 2015kii saldhig Eritrea (Casab) loo oggolaaday in ay xulafadu ka duulaan oo ka duqeeyaan Yaman. Taas oo xogo soo baxay Feebarweri 2021kii ay tilmaameen in Imaaraadku dib u fur-furtay saldhiggi Casab oo dib u gurasho bilaabay. Salhig-gaas oo ciidanka Suudaanna laga daabbuli jirey una ahayd sal ay diyaaradaha xulafada ee Imaaraadku ka duulaan.

Xuutiyuunta oo qabsaday mee-lo u dhow Baabul Mandabka waxa uu haddana Imaaraadku bilaabay in uu keliglii xoogga saaro qeybaha xeebaha ee Galbeedka iyo Koonfurta Yaman, kana bilaabo hawlgallo duqeyneed si aysan Xuutiyiintu u xidhin marinka Baabul Mandab iyo meelo u dhow oo ay se maanta awood u yeeshen in ay halis geliyaan iskusocodki maraakibta iyo badeecada-ha. Imaaraadku waxa uu aad u raadinayay xulafo kasta oo uu la yeesho waddamada dhaca badanka Gacanka Cadmeed oo uu illaa haddana uu wadaa, ha ahaato Jabbuuti, Somaliland, Somalia-Puntland, iwm.

Jabbuuti oo dhacda marinka Baabul Mandabka si uu ugu is-ticmaalo duulimaadka diyaara-dhiisa dagaalka oo ay hore u joogtay shirkaddiisa DP World oo timid 2006dii, laakiin diid-

madii codsigaas ee Jabbuuti waxa uu bilaabay in uu raadiyo saaxiibbo kale oo ay u dhaweyd Berbera iyo Somaliland oo uu heshiis la galey 2016kii iyo sida oo kale maamullada Soomaaliya oo dekdedda Boosaaso u horreysso ee Buntilaan. Imaaraadku waxa uu aad ugu dhaqmayay arrin ahayd waa in aad buuxisa gaab kasta oo Geeska Afrika ama Gacanka Cadmeed ah si aysan cid kale u buixin oo halis hadhow ku noqon karta maslaxadhiisa.

Imaaraadka waxa uu sida oo kale siyaasaddiisa isfidinta ka mid ah in uu gacanta ku qabto jasiiradaha Gacanka Cadmeed iyo Indiyaanka dhaca ee ka ag dhow. Abril 2018kii Jasirradda Soqodra (Socotra Island) oo Yaman leedahay oo qiyas ahaan 300km u jirta, Soomaaliyana 100km u jirta ayaa uu ciidan ku daabbulay. Waa urur jasiirada ah oo muhiimad istiraati ah oo weyn leh, dawlado badanna ay raadinayaan, gaar ahaan xilligan xiisada Yaman ay aad u kordheen ee Xuutiyiintu. Imaaraadka illaa 2000 ayaa uu daneynayay goobahan, hawgallo bini aadantinnimana uu ka fidin jirey. Iiraan baa iyaduna galaangal ku lahayd xilligii dawladda Yaman jirtey ee xasillooneyd. Ururkan jasiiradaha ah oo mararka qaar duufaan-no badeed ku kacaan oo aad u dhibaateeyaan, sida 2015kii iyo 2016kii, Imaaraadku kaalin aad u firfircooon baa uu ka qaataay u gurmashadooda, sida

oo kalena adeegyo kala duwan baa ay ka dhiseen oo xarumo iyo cisbitaal ku jiraan, iwm.

Xilligaa iyo 2017kiiba ciidamaada xulafada Suciudi-Imaaraadku waa ay joogeen Soqodra. Xilligan dambe ciidamo buuxa oo qalabkoodu u dhanyahay oo Imaaraad ah baa jasiiradda la wareegay maamulkina kala direy. In kasta oo xogaha qaar tilmaamayaan in heshiis kiro ah ay la galeen xukuumaddii Mansur ee Yaman, haddana la inkirey. Imaaraadka waa lagu kacay markii uu ciidanka soo geliyay jasiiradda Meey 2018kii, haddana waxa uu ka hor keenay dad isaga taageersan oo So-

qodriyiin ah.

Maraykanka ayaa isaguna xaaladda ugu baaqay xilligaa in wadahadal iyo dejin lagu dhammeeyo, halka Turkiga oo la loollama Imaaraadka uu tilmaamay in ay tahay xadgudub ka dhan ah madaxbannaanida Yaman. Wixii intaa ka dambeeyay xooggi Imaaraadka culayskiisa wadahadal baa lagu saaray uu Sucuudigu qeyb ka ahaa, in kasta oo dib loo keenay ciidamo ka socda xulafada Sucuudiga.

Illaa September 2020kii ayaa xogo kale soo baxeen in Imaaraadku saldhig millat-



**Cidda go'aamisay jugta siyaasadeed ee MoU-da sawir farrin ka diraya sow maaha?**

eri ka dhisanayo jasiiradda, sida oo kale Golaha Kumeelgaadhka Koonfurta Yaman (South Transitional Council – STC) oo ah garabka ugu xooggan dhanka Koonfurta, goonni-isu-taagna ah, Imaaraadkuna dhabar u yahay ay gacanta ku qabteen jasiiradda, iyaga oo horena qeybo badan oo Koonfurta Yaman ah gacanta ugu qabtay, halka ay dekdedda Cadanna xukumaan Imaaraadku. Intaa wixii ka dambeeyayna jasiiradda aad baa loo millataareeyay. Sida oo kale

isla xilliyadaas waxa soo baxay xogo tilmaamaya in Israa'iil iyo Imaaraadku ay shuraako ku yihiiin arrinkan jasiiradda Soqodra oo Xuutiyiinta looga cabsi qabo, horraantii horena la keenay qalabyo wardoon oo lagu la socodo hawlahan, iwm.

Illaa laba sannadood ka hor waxa soo baxay xogo tilmaamaya in Imaaraadku uu saldhig-ciidan cireed ah ka dhistay Jasiiradda Mayun (Perim Island) oo ah jasiirrad folkaano ka dhalatay oo marinka Baabul Madanbka kaabiga ku haysa. Imaaraadku waxa uu rabaa in uu marin kasta iyo wadiiqo kasta oo biyaha Indiyaanka, Gacanka iyo Baddacasba uu xukumo oo uu saameynna ku yeesho. Imaaraadku waxa uu ku fekerayaa in koonfurta Yaman iyo Soqodra ay yihiiin bud-dhigga ganacsiga adduunka, cid wal oo arrima-haas dan ka soo gashana ay iyaga u daba fadhiisato, sida mashruuca weyn ee Belt and Road Initiative ee Shiinaha.

### Xiisaddii Khalijka iyo Xulafadii Geeska

Fiditaanka Imaaraadku waxa uu xoogeystay markii uu soo ifbxay loollankii khaliijka ee 2017kii (Gulf Crisis 2017) oo Imaaraadka, Suciudiga, Bax-rayn iyo Masar ay xidhiidhka u jareen Qadar oo cunqabateyna ay ku soo rogeen, iyaga oo ku eeddeeyay in ay aysan daacad ka ahayn dagaalkii xulafadu ka waddey Yaman. Mar kalena Masar baa ku eedaysay in Qadar

ay ururrada argagixisada ah tageerto, sababahaas dartood-na loo go'doomiyo.

Qadar iyo Imaaraadka oo lool-lan istiraatiiji ah ka dhexeeyo, kuna loollama gobollada kala duwan ee Bariga Dhexe, Geeska Afrika iyo Waqooyiga Afrikaba ka mid yihiiin, Masar xukuumadeeda cusub ee inqilaabtay hoggaankii la doortay ee urur-ka Ikhwaanul Musliiminka ahaa ayay ka dabasocotay, maaddaama ay Qadar taageere siiso ururka, ayna ku soo dhaweyso dalkeeda, badanaana ay kaalin debecsan (Soft role) ay ka qaadatay shidaalinta kacdoon-nadii gu'gii Carabta. Dhanka kalena ay mar walba Qadar u taagantahay kaalin caksi ah oo xoojinta isbeddellada iyo kacdoonnada aan dawliga ahayn (revolutionary empowerment role) oo aanay is waafaqaynta ay ciyaraan Imaaraadku ee xasilloonida rajiiomyada xididay-stay iyo taageeradooda.

Loollankaas darani waxa uu keenay in dhinac walba uu xulafo u raadsado caalamka, gaar ahaan kuwa ugu soo xiga oo Geeska Afrika ay ugu horreyso. Imaaraadku xilligan waxa uu ku soo beegamay iyada oo xukuumad Qadar u jan-jeedha ay timid xukunka Filla Soomaaliya, sidaa darteed waxa ay qaadatay kaalin kale oo ah in ay sii xoojiso maam-ullada federaalka ee Soomaaliya iyo dhinaca Somaliland si aysan u dayacmin kaalinteedu (Peripheral strengthening). Sida

in ay hesho saldhigyo, ayna bil-lowdo dhismaha dekedaha iyo gacan-ku-qabashadooda iyada oo ay mas'uul uga tahay shirk-adda DP World oo ah mid ka mid ah qalabyadeeda istiraatiijigga ah (UAE strategic tools).

Mar kale waxa ay Imaaraadka iyo Suciudigu fursad ku heleen isbeddelki cusbaa ee Ethiopia oo uu xukunka ku yimid Abiy Axmed 2018kii, isaga oo uu Abiy bilaabay isbeddello dhaqaale oo Imaaraadka ula muuqday fursado gobolka ah iyo ballaadhinta saameynteeda. Maaddaama oo Ethiopia ay aad ugu tiirsaneyd dhanka Jabbuut-ti, Imaaraadku waxa uu ku qan-ciay in Ethiopia ay dekeda Berbera ee DP World gacanta ku qabatay ay 19% saami ah ku yeelato oo ay dhankan u soo jeediso adeegsigeeda.

Suciudiga iyo Imaaraadku waxa ay gogolxaadheen in 2018kii ay dhexdhexaadiyan heshiis lagu soo afjarayay khilaafkii dheeraa ee Ethiopia iyo Eritrea, iyaga oo mid walba ballanqaad u sameeyay sida in Ethiopia lacag la siin doono, halka Eritrea laga kaalmeyn doono sidi looga qadi lahaa cunqabateynta.

Heshiisyadii saddexgeesoodka ahaa ee Abiy, Afwerki iyo Farmaajo, waxa ay Imaaraadku rejayanayeen in uu keeni karo heshiintaa iyaga iyo xukuumaddii Farmaajo. Imaaraadku waxa uu ku dhaqmayay siyaasad ah in aad xidhiidho kala duwan sameysato oo aanad cid



### Ka bixiда ayaa Suudaan ku rogay ka midigtā

qudh ah ku tiirsanaan marka ay gobolka joogto (Relations Diversification), taas oo ay dabcan aad ugu faaiideen marka loo eego xilligii ay Jabbuuti iyo xukuumaddii Farmaajaba ay isku dhaceen Imaaraadka.

Mar kalena sannadkaas Imaraadku waxa uu maalga-shaday dhinacyada korontada nadiifta ah, beeraha, ganacsiga, kaabayaasha dhaqaalaha iyo tamarta cadcadeedda ee Ethiopia. Sida oo kale wadashaqeyn iyo heshiisyo dhanka amniga khuseeyana waa ay jireen heer ay so baxeen warbixino tilmamaya in Imaaraadku dawladda Ethiopia ka kaaaliyay dagaalkii waqooyiga ee 2020-2022, isaga oo qalab iyo tabbarba siiyay ciidanka dawladda oo ay ku jiraan diyaaradaha iswada, iwm.

### Dagaalka Suudaan

Suudaan markii laga gooyay koonfurteeda (South Sudan) sannadkii 2011kii oo ahayd isha ugu weyn ee dhaqaalaha waddanka ee shidaalka wax ku dhow 75%. Halka maanta shidaalku ka yahay waxsoosaarkeeda dhaqaale wax lagu qiyaaso 1%. Wixii intaa ka dam-beeyay dhaqaalaheedu waxa uu ku tiirsamay qeyb ka mida dhanka xoolaha oo ay Sucudiga u dhoofin jirtey wax ku dhow 25%, 70% wax ku dhow oo dhanka dahabka ah iyo wax guud ahaan 5% ah oo beeraha dalagga ka soo go'a oo cudbigu u weynyahay, iwm. 2012kii ayaa aagga Jamal Caamir ee waqooyiga Daafuur laga helay dahab, kadib Suudaan waxa ay u noqotay fursad weyn oo kale oo lagu hagaajin karo dhaqaalaheeda halista galey.

Xilligaas oo hoggaankii

maleeshiyaadkii Janjawiidka ee hore Hilaal Muusa (intaan Rapid Support Forces – RSF laga wada dhigin) uu deegaanka gacanta ku dhigay, hawlaha dahab qodistana uu si buuxda ula wareegay. Dahabka qaarkiis waxa iibsan jirtey dawladda Khartuum fadhida oo ku iibin jirtey sicir ka badan ka suuqa, si ay iyaduna Dubay (Imaaraadka) uga ga iibsato lacag xooggan. Waa halkan halka uu ka bilaabmay xidhiidhka labada dhinac ee dhaqaalaha ku saleysan ee Suudaan iyo Imaaraadka.

Sannadkii 2017kii dhoofinta dahabku waxa uu waxsoosaarka Suudaan ka noqday wax ku dhow 40%. Dahabka Suudaan waxa si buuxda u maamula xooggaa RSF, waxaana dahabkaa loo dhoofiyaa oo ugu weyn waddanka Imaaraadka. Lixda waddan ee Suudaan ugu Eeg Boggaa 30

## Ka yimid Bogga 29

horreeya ee ay wax u dhoofiso (2018) waxa kaalinta koowaad ah waddanka Imaaraadka. Dhanka Imaaraadka waxa ka jira shirkado kala duwan oo loojistikada iyo wixii RSF u baahantahay ka soo abaabula halkaas, kalana macaamilaan labada dhinac iibinta dahabka iyo wixii la xidhiidha. Laba ka mid ah shirkadaha ay ku leedahay dibadda ee RSF aasaaska u ah waa 'Sudan Technology Company' iyo 'Trotive General Trading LLC' oo labadooduba saldhiggoodu yahay Imaaraadka.

Haddaba khilaafkan hubaysan ee Suudaan ka socda ee u dhixeyya ciidamada qaranka iyo xoogga gaarka ah ee Rapid Support Forces (RSF), Imaaraadku waxa uu taageere buuxda la barbarjoogaa garabka RSF ee dahabka qoda. Xilliyadii uu bilaabmay dagaalka Yaman ee Sucuudiga iyo Imaaraadku xulafada sameysteen ayaa xukuumaddii hore ee Suudaan ay oggolaatay in ay u dirto guuto ka barbar dagaallanta xulafada oo uu madax ka ahaa Gen. Cabdifatax Al-Burhan, haddana dhawr bilood ka dib ayay hoggaanka RSF ee Maxamed Xamayti goonidii-sa si madaxbannaan dawladda Imaaraadku uga dalbatay ciidamado aad uga badan kuwaas.

Ciidamada RSF oo warbixinaha qaar sheegeen in 2016-17kii ay ciidanka Suudaan ee ka dagaallamayay Yaman lagu qiyaasay 40 kun. Imaaraadku waxa uu

dalbaday xilligaas dagaalku qarxay in ciidanka RSF ay la xoojiyaan dhanka koonfurta Yaman iyo aagga dekedda Xundayda ee Galbeed oo markaa ay Xuutiyiintu ku soo durkayeen. Xilliyadaas ciidan RSF ah oo lagu qiyaasay 16 kun waxa la geeyay xuduudda Yaman iyo Sucuudiga u dhixeysa, si ay u ilaaliyaan Riyaad. Xukuumaddii cusbayd ee rayidka Suudaan ee 2019kii waxa ay soo dib u soo celisay keliya 10 kun oo ciidan ah guud ahaantood. Mar kale xilligii Imaaraadku farageliyay dagaalkii sokeeye ee labaad ee Lübiya 2014kii, waxa uu hoggaanka RSF u direy Gaas ciidan ah oo ka barbar dagaallamayay Jeneraal Xaftar, kuwaas oo mushaharkoodana uu Imaaraadku bixinay.

Waxa muuqata oo soo ifbaxday in wax dhaafsiisan ganacsiga dahabka laga wadashaqeysto oo siyaasadda iyo dano istiraatiijiyadeed ay ka mid yihiin, maaddaama Suudaan isbeddel ka dhacay in Imaaraadku ilaa-lyi maslaxdiisa iyo cidda uu taageersanyahay oo waddanka gacanta ku qabata, in muddaana xidhiidhkaa dheer la soo dhisayay oo la naixinayay. Taageere baaxad weyn oo illaa heer wax walba laga caawiyo ciidamada RSF sida; hub, tabbar, qalab, gaadiid iyo daryeelba iyada oo dhammaadkii 2023kii ay dawladda Suudaan ku eedeysay in hub Imaaraadku uga soo gudbiyay dalka Jaad ciidanka RSF oo ay ka eryeen waddanka illaa 15 diblomaasi

oo Imaaraati ah.

Dhanka kale xukuumaddii hore ee Suudaan oo bilowday dedaallo ay kor ugu qaadayso xoojinta dhinaceeda beeraha (Agricultural sector), waxa ay ku kelliftay in ay dawlado shisheye heshiisyo kiro ah la gasho sida Turkiga, Shiinaha, Sucuudiga, Imaaraadka, Masar, iqk. 2018kii ayay Qadar iyo Turki-guba la galeen Suudaan heshiisyo lagu dhisayo adeeg dekadeed ee magaalada Suwaykiin oo koonfur ka xigta dekedda Suudaan, taas oo ka dhigneyd suuragalmimada in Turkigu uu biyaha Baddacas saldhig millateri ku yeelan karo, in kasta oo ayna arrintaasi ka suuragelin labada dhinacba, heshiiskiina ay joojiyeen golihii millateriga ee cusbaa.

Xukunkii Cumar Al-Bashir ee muddada dheer oo ay Imaaraadku dhabarka u ahaayeen, iyaga oo ilaalinaya xasil-loonida rajiumka (Regime security/authoritarian stability) iyaga oo liddi ku ahay kacdoonnada jamhuuriga ah ee dhiggeeda Qadar ay u farad-huudhubantahay, haddana millaterigii cusbaa ee waddanka inqilaabay ayay taageere baaxad weyn u fidisay. Xilliyadaas oo Imaaraadka iyo Sucuudiguba ay halis u arkayeen heshiiskii hore ee Turki-Qadar iyo Suudaan maaddama oo uu loollan kala dhixeyyo Turkiga iyo Qadar, ayna taagnayd xiisaddii Gulf Crisis ayaa ay deeq lagu qiyaasay \$3 bilyan ku ta-

ageereen golihii millateriga ee inqilaabka sameeyay si uu u joojiyo heshiisyadii hore loo galey.

### Dhaqdhaqaqyada Cusub

Somaliland iyo Ethiopia isafgaradka ay kala saxeexdeen Jeenaweri 2024 waxa uu ka mid ahaa gogolxaadhyada ay Imaaraadku galaangalka ku lahaayeen, maaddaama ay Abiy uu yahay mid ka mid saaxiibbadeeda istiraatiijigga ah ee gobolka, horena uu u jirey heshiiskii 2018kii ee DP World. In biyaha Gacanka Cadmeed la keeno Ethiopia waa mid ka mid ah dedaallada Imaaraadku aad u naawilayo, iyada oo saldhigna u raacayo, si fududna ciidamo farabidan looga heli karo Ethiopia. Dhan kale, sannadkii tagey dhammaadiisii Abiy Axmed waxa uu la kulmay hoggaanka ciidanka RSF, Maxamed Xamdaan Dooglo "Xamayti", dabcan labadooduba waa shuraakooyinka ugu waaweyn ee istiraatiijiyadda gobolka ee Imaaraadka (Strategic partners).

Dhinaca Buntilaan ee Soomaaliya oo uu Imaaraadku in muddo xidhiidho kala duwan la leeyahay oo dhinacyada amnigu u badanyihin, waxa soo baxday dhawr maalmood ka hor in deegaanka Xaafun (Raas Xaafun, Raas Casayr) oo ku yaal Gardafuu oo cidhifka ugu Barieyeeyaa Afrika ah oo ah meel ay ku kulmaan badaha Indiyaanka iyo Gacanka Cadmeed, aadna u ah dhul istiraatiiji taariikh-iyian, jasirad u ekene ah in uu

Imaaraadku saldhig millateri ka dhisanayo. Warbixinuhu waxa ay tilmaamayaan in sannadkii la siinayo lacag dhan \$57 milyan, oo wejiga heshiiskana illaa \$7 milyan lagu kala qaadanayo. Middaas oo ka dhigan in bishii lagu kireynayo lacag u dhexey-sa \$4-5 kun.

Hadda oo keli ah arrimahani ma soo ifbixin, balse illaa dhawrjeer oo kala duwan baa ay wararkani soo noqnoqdeen, warbaahinta Buntilaanna aad u faalleysay. Feebarweri 2020kii ayaa taliyaha ciidamada Maraykanka ee AFRICOM uu soo gaadhay Buntilaan, markaas oo ay soo ifbaxeen wararka sheegaya in saldhig laga dhisayo Xaafun oo Imaaraadku leeyahay, iyada oo Maraykankuna waddooyin Boosaaso iyo Garoowe ku xidhaya Xaafun uu dhisidoono. Maraykanku illaa bilowgii hirka argagixiso la dirirkasaameyn iyo joogitaan muuqda baa uu ku leeyahay aaggaas, ciidamada Puntland Security Forces (PSF) aasaaskeedii qeyb buu ka ahaa illaa haddana waa uu taageeraa oo xidhiidh buu la leeyahay.

Mar kale oo ku beegnayd Feebarweri 2023 ayaa haddana uu madaxweynaha Buntilaan uu safar ku tagey dhulkaas Xaafun, iyada oo warbaahinta qaarkeed tilmaamaysay in uu dhagaxdhigayo saldhig millateri oo Imaaraadku leeyahay.

Haddana Oktoobar 2023 waxa soo baxay warar kale oo tilmaamaya in wefti Imaaraad ah uu

tagey Xaafun, waxaana ujeed-dada weftiga ka mid ahayd in ay saldhig millateri raadinayaan iyo in ay deked maraakiibtu ku kala wareejistaan konteennar-rada ay dhisayaan. Labadan qodob oo ay ka muuqato istiraatiijiyadda Imaaraadka ee bal-laadinta ganacsiga iyo arrimaha amniguba. Hawshan oo kolka la isku soo ururiyo u muuqata mid illaa 2020kii soo socotay, Imaaraadkuuna aad u daney-nayo marka loo eego maslaxadiiisa iyo wadashaqeeynta uu maamulkaas la leeyahay oo ay ku lammaantahay xiisadaha ka taagan Gacanka Cadmeed.

Sida oo kale intii dib loo door-tay Xasan Shiiikh oo uu caadiyyoobay xidhiidhkii Imaaraadku waxa kale oo sannadkii hore Maarij 2023kii ay Jubalaan baahisay boqol gaadiid dagaal ah oo Imaaraadku ugu deeqay hawla amniga iyo wadashaqeeynta labadooda ka dhexeysay. Waxa kale oo soo baxay xogo tilmaamaya in Imaaraadku saldhig millateri uu ka raadinayo Kismaayo, dhanka dekkeda Kismaayo iyo gegida dayuuradahana uu la wareegi doono. Waxa kale oo jirta xogo ah in Imaaraadku rabo in uu isu soo dhaweyo madaxweynaha Jubalaan, Axmed Madoobe iyo raiisalwasaaraha Ethiopia, Abiy Ahmed oo kaalin dhexdh-eaadineed uu qaato, maaddaama Axmed Madoobe aad ugu xidhnaa xukuumaddii dhacday ee TPLF ee Ethiopia.

Ka yimid Bogga 31  
**Gunaanad**

Imaaraadku waxa uu isku deyaya in uu ilaaliyo oo di-faacdo maslaxadihiisa dhaqaale, siyaasadeed iyo saameyneed, iskuna ballaadhiyo gobolka oo saameyn weyn ku yeesho, isaga oo sida oo kale isku deyaya in uu ka hortago khataraha kala duwan ee kaga iman kara jaarka dhow iyo jaarka fogba. Waxa uu rabaa in uu xoogga saaro oo joogteeyo saameyn ku yeelashada dekedaha, jasiiradaha, maamullada, dawladaha iyo mandaqadda oo dhan, isaga oo u maraya habab kala duwan oo dhinacyo badan taabanaya.

Mid ka mid ah saraakiishii maamulkii Donald Trump oo mar sifaynayay Imaaraadka waxa uu yidhi; "Dhagaxaad rogtaba ee Geeska Afrika yaal, Imaaraadka ayaad ka dhex helaysaa.". Imaaraadka waxa ku dhiirrinaya dhammaan dhaqdhaqaqyadan in uu xasillooniidiisa gudeed ee boqortooyada ka ilaashado kac-doon kasta oo saameyn ku yee-lan kara, kana hortago cid kasta oo halis dibadeed ku noqon karta marinnda ganacsiyadiisa ee Gacanka Cadmeed iyo Badda Casba. Maanta waa mid ka mid ah awoodaha gobol (Regional power) ee saameytiisu ay aad-ka u soo ifbaxday, mandaqado kala duwan oo Bariga Dhexe, Badaha u dhow, Geeska Afrika, Bariga Afrika iyo Waqooyiga Afrikaba laga dareemay.

**W/Q: Cabdifataax Xasan-Barawaani**

Email: barawaani@yahoo.com

# Qofku Wuxuu Bislaadaa, Wakhtiga Uu wadnuhu Gubto!

**G**ugii 2022ka wuxuu ii ahaa kal-tirsii aan dib u dhashay. Intii ka horaysay ma aan aqoonin ruuxdayda iyo wax kasta oo la gudboon nolosha dhabta ah, nolosha halbeegeedu yahay barashada ruuxda. Badiba dadka way ka daahan tahay ruuxdu ismania yaqanaano qofku ilaa uu ka barto ruuxdiisa iyo sida loo adeegsado, gugii 2022ka waxa uu i siiyay hadiyad aan hanto tii ugu mudnayd oo ah tarbiyad sees u ah qofku sida uu u ahaan karo bani aadam dhinac kasta caadi ah.

Da'da dhabta ahi ma aha inta sanadood ee qofku uu ka soo tirsado maalinka uu dunida yimi, balse waa hadba inta uu ka shaqaysiin karo dareemadiisa gudeed, dareemada waayo aragnimo ee ku duugan Ruux-

da oo iyadu ah mid aad uga fac wayn qaybleen jidheed ee maadiga ah.

Gugii ina dhaafay ee 2022-gu wuxu ii curtay aniga oo daba ordaaya himilooyin aan dejistay oo aan u arkayay waxa u qaalisan ee aan hanan karo xaqiiqadu se waxay tahay in aanan dhammaan himilooyinkaas hal midna hanan taas badalkeese aan hantay wax kale oo ka qaalisan oo ah barashada barashada gudahayga. Sida caadiga ah qof kastaa waxa uu leeyahay riyooyin uu daba ordaayo iyagana u arko waxa ay ku xidhantahay farxadiisa iyo badhaadhaha loo wada ruclaynaayo, madaxni-mo, aqoon maadi ah, tabcasho lacageed, saaxiibo ama guryo iyo gawaadhi, safarada dalxiiska ah iyo waxyaabaha la midka ah.

وَاللَّهُ يُحِبُّ الْمُحْسِنِينَ

**And Allah loves the doers of good.**

@TaqvaOfficial  
Quran 3:134



Qof ayaa heli kara in uu aqoon maadi ah oo qaali ah barto, ama tabco lacag badan, ama wuxu helay xil loo dhiibtay iyo wax lamid ah isaga oo u arkaya in uu gaadhay hadaf wayn oo guul u ah farxaddna uu ku helaayo waa wax iska caadi ah oo qofkasta la kulmi karo, balse taasi way ka duwantahay xaqiiqda dhabta ah ee nolosha aadamahu u baahantahay, dadku inta badan waxa ay daba ordayaan waxyabaha uu waqtigu u soo bandhigo ee maadiga ah, iyaga oo indhaha ka qarsanaya ama aan xilligaas dhaadi karin fariimaha uga imanaya gudihisa iyo deegaanka ku xeeranba.

Gugaas galbaday ee 2022ka waxa aan la kulmay in ka badan 50 qof oo masuuliyiin ah. Dhammaantood waxa aan kala hadli jiray oo ku qancin jiray in ay gacan ka geystaan sidii aan u heli lahaa fursad aan hogaan kaga noqdo xafiisyada bulshada looga adeego ama xil dawlaadeed. Waxa aan huray waxkasta oo aan ku kasban lahaa sidii aan u gaadhi lahaa damacygaas. Waxa aan huray waqtii, joogtayn, dadaal.

Waxa aan huray dedaalkasta oo aan ku qancin karaayay masuuliyintaas, hoga tusaalayn aan tiro yarayn waad dareemi kartaa waqtiga iyo tamarta ku bixi karta la kulanka dadka tiradaas leh qaarkoodna aanay kuu lahayn garasho hore waxa waqtii ah. Waqtigaaas aan dadaalkayga oodhan sidaas iskugu

geeyay hal jiho Isla aniga ayaa dagaal kale kula jiray dooni-stayda, mana aan fahansanayn qiumaha aan anigu leeyahay keliyaata waxa dhafoorka hore ii saarnaa oo ii muuqday uun qiumaha dadkan aan la kulmaayay, waxa sabab u ahaa garasho la'aanta iga haysatay ruuxdayda. waxa iga qarsoonaa fariumaha ay iisoo gudbinaysay ruuxdaydu, isla markaana waqtigu waxa uu daqiiqad kasta iiga faaidaysatay maankaygu in uu raaco waxyabaha ay u soo bandhigayaan waqtiga & naftaydu.

Waxa aan isku aqaanay qof wanaagsan oo leh dhaqamo badan oo wanaagsan iyo qaar xunba waxa aan ogAADAY oo aan Sanadka 2022 xaqiisday in aanan is aqoonba una bahanahay barashada naftayda si aan u gaadho waxkasta oo ay noloshu ii diyaarisay oo aan si fudud ku hanan karo qof ahaan kadib barashada ruuxdayda. Waxa aan ka baqan jiray waqtigu waxyabaha uu igu hor goynaaayay, waxa aan ilaaway xoogayga, waxa aan ka dhuuntay jiritaanka hillinka aan u mari lahaa doonistayda waxa aan isku qancinaayay waxkasta oo aan ku taagnayn rukumo asal ah.

Waxaan isku aqaanay oo waqtigu l sheegi jiray ama igu hagay in aan necbaa in aan qof been u sheego ama xumeeyo, caadi fi noqdo, dadka afaarahooda faraha la galo, go'aano leey-

hay, isla wayneen iyo waxkasta oo aan isku maaweelin jiray! 28sano kadib waxa aan ogAADAY waxkasta oo wanaagsan oo aan heli karo/helaayo in ay ka horayso sida uu u eeg yahay saafisanaanta qalbigaygu. Inaad xukumida umadda raadiso oo isku aragto qof mudan waxa ka horaysa in aad qirto jiritaankaaga, iyo ka go'anaanshaha qabashada shaqo umadeed.

In aad been sheegto ama aanad sheegin waxa ka horaysa oo asal ah in aad necbaato beenta iyo beenaaleyaasha. In aad qofkasta caawiso waxa ka horaysa in aad marka horeba aaminsanaato asalka waajibaadkaasi. In aad xanta necbaato waxa ka horaysa in aad asalka xanta necbaato oo ka fogayso naftaada. In aad isla waynaan dareento waxa ka horaysa in aad aragto tabar yarida basharka ugu horayn.

In aad dad kale wax u quudhi waydo waxa ka horaysa in aad labadaada indhood ku aragto EEBBE sida uu qofkasta u arsaaqayo xisaab la'an, in aad isku aragto qof wanaagsan waxa ka horaysa in aad barato asalka faa'iidada wanaaga, in aad xumaha samayntii-sa ka badbaado ama necbaato waxa ka horaysa in aad ahaanshaha xumaanta necbaato si aanad ugu dhicinba, samaynta caadooyinka xunxun iyo ka fogaatooda waxa ka horaysa fahanka asalka caado xun dhanka ay kaaga timaado ama naftaada kaga jirto si aanad u

samaynin ama uga saarto naf-taada . Wuxaas oodhami waa ubucda mushkiladaha iyo is di-idooyinka ku dhaxaysa waqtigaaga naftaa-dada iyo ruuxdadaba.


Waxkasta oo aan u aqaanay in aan ku xumahay ama ku wanaagsanahay waxa aan guga 2022 si dhab ah u xaqiisday in aanan aqoonba u lahayn asalka caadooyinka aan jeclahay ama necbahay, Tusaale in aan dadka caawiyo ama anan niyad jabin waa waxyabaha aan is odhan

jiray waad ku wanaagsan tahay, hadana gadaal waxa aan ka ogaaday in aan dhibaato badan kala kulmay ama cid kale kala kulantay oo aan sababta leeyahay anigu ismana ogayn oo waaban ku faanayay qiyaasti .

Caadooyin badan oo aan tiro lahayn waxa aan u samayn jiray si niyad ah waxaana ay ahaayeen dhamaatood waxyaabo aanan u baahnayn samayntoo-da maanse aqoonin. Tusaale waxa aan dhib anaan aqoonin kala kulmay gudahayga wax-

kasta oo aan samaynayay wax aan arkayay in ay wax sax ah yihiin, in aan qalbi wanaagsanahay in aan aad wax u aamino, in aan qofkasta is dhaho tilmaam ama caawi iyo in aan cidkasta u arko in aan is fahanay. In aan dhibaatooyinkayga ka qarsado dadka iigu dhaw ee qoyska ah oo kaligay isku qanciyo in aan xalkooda keeno iyo in aan waqtii badan ku lumiyoo waxkasta. In aan daalo anoon natijo sax ah helin, in aan isku qanacsanado iyo in aan xanaaqaqo.

## The execution of Islamic penalties (hudud) : Myths & facts



FB.com/DarAlltaalinEgypt

In aan farxo, in aan cidkasta u arko in aan qancin karo iyo in aan qofkasta si damqasho leh uga codsado waxyabaha ii muuqday in uu markiiba xalin karo. In aan ka dhuunto jiritaanka dhibaatadayda. Wuxaas oodhami hubaal waxa ay iga dhigayeen qof aan meelba u socon taas badalkeedana waxaan ahaa qof aanay deganayn gudaha naftiisu laakiinse aanu qofna dhaadi karin! Sidii aan u saarnaa doomaha waq-

tigu igu raray si aan kala joogsi lahayn ayaa waxa aan si lama filaan ah u maqlay cod naxariis leh ooo kasoo baxaya gun-ta hoose ee qalbigayga! Waxa anoo suursan dareen suuxdi-maad ah camal maqlay "Hanad joogso fadlan u tudh naftaada oo maqal ruuxdaada"! Halkaas ayaa waxa iiga bilaabmay safar dheer oo aan ku helay cus-boonaysiinta naftayda iyo jidka ay hayso.

Waxa aan dib uga baxay kun talaabo waxkasta oo aan hamilahaa waxa aan si teelteel ah u dhagaystay ruuxdayda anoo u laabtay asalka jiritaankaya. Waxa ii timi risaalad kamid ah kuwa ruuxdayda ka sifaysay gudaha naftayda waxa aanan si halhaleel ah u maqlay cod dabacsan oo ruuxdaydu igu leedahay: "Qofku waxa uu ku bogsadaa in uu ka tago waxa daalinaya, si uu ugu dhawaado waxa u fududeeyaa oo mugdigiisa iftiiminaya. Markaan maqlay bilawgii maan fahmin marküuba, se waxa aan dhex qaaday safar raaxo leh oo aan dib uguga bogsanayay malaayiin xanuun aan qabay halka aanan midna ka aqoonin xanuunadaas! Baniadamku marka ay meel jidh-kiisa kamid ahi xanuusato wuxu aada dhakhtar daweeya, waxa se hubaal ah xanuunka u daran ee qof ku dhacaa in uu yahay aqoon la'aanta gudihiisa.

Technologyiada oo ah waxa u wayn ee i caawinayay ayaa il-bidhiqsi kasta oo aan galo qa-

ybaha warbaahinta bulshada maskaxda ku xidhay kaliya in aan kaa raadsado ama ka daalacdo waxa ay ruuxdaydu ii sido ee ii sheegayso, Technologyiada waxa ay toos ii dhix gaysay ilbidhiqsi kasta waxa ay ruuxdaydu ku dagayso kuna bog-sanayso waan akhriya, daawada waxa u wayn ee aanan ilaawi karin ayaa ah in ay si toos ah Technologyiada iiga xidhay waxkasta oo aan ka baaqsan karayay in aan arko, Tusaale waxkasta oo lagu faafiyo baraha bulshada ilaa aan anigu raadsado maba ay i hor iman jirin maan dhaadanayn in uu gudahayga ku socdo Hanuun ruuxi ahi, gadaal baan ka ogaan doona.

Waxa aan soo gaadhay marxalad aan waxkasta fahmay qüimo ka wayn oo ka yaab badan kii hore ee aan ku aqaanay, waxa aan si qoto dheer u fahmay Quraanka oo aanan aqoonba u lahayn macna ahaan, waxa aan si dhadhan leh u fahmay qaybaha kala duwan heesaha aan dhagaysto, waxa aan bartay qüimaha baniadamka, xaya-waanka, deeganka iyo waxy-aabaha maadiga ah ee aduunka kor yaala.

Waxa aan saacad waliba arkayay oo maskaxdayda kusoo dha-cayay Fariimo si dhab ah ugu taxan qaybaha jidhkayga waxa ay ruuxdaydu ii sheegtay si dareen kawar qabid ah "Hanad Waa inaad ka ilaalisaa wadna-haaga xanuunka markaad arag-

to cida xanuujinaysa! Ee ku soo noqnoqta noloshaada. Wixaad ku jeceshahay qalbigaaga oo dhan, waxaadna ka fikiraysa kuwa kugu xeeran. Sababtaas awgeed, way adkaan kartaa in la helo qof ku fahmaya, laakiin waa muhiim inaad xidhiidha-daada oodhan u doorato ci-dii kula wadaagta qiyamkaaga uma baahnid qofkasta oo aan kula jiritaan ahayn"

In aan maqlo runtan ku tax-an jiritaankaya waxay ii ahayd aqoonsi dhab ah oo isku he-lay, xanuunka u badana anigu aan ahaa ka gacmaha ku hay-stay manaan garanaynin, waa kasoo horjeedka doonistaydi iyo damacayga xanuunkaygu aanan iskuba ogayn. Marwalba waxa aan maqlayay fariimaha iiga imanaya ruuxdayda oo ah kuwo igu hagaaya in aan no-losha dhabta ah waajaho kana baxo aagaga mugdiga. Wax aan bartay aniga oo maskaxda ku haya, in aan aad ugu fiirsa-do habka aan u wada xidhiidho qoraal iyo hadalba ruux ahaan si aan Naftayda u siyo

ammaan iyo in aan dib u celiyo si aan iskugu dheellitirnaado.

Ruuxdaydu waxa ay i bartay in aan naftayda siyo sumcadda aan u qalmo iyo in aan maa-reeyo dib dhigashada helitaana qaarkood si aan u arko Sawirka waxa ka weyn ee ruuxdaydu isi-inayso. Waxa kale oo aan bartay oo ay ruuxdaydu igu hag-tay in ay waajib tahay in aan

aamuso, aaamusnaan sharaf leh waxa wax laga naxo ah oo aanan aqoonba in laga hadlo mowduucyo guud gaar ahaan marka dadka kale aysan haynin dhammaan macluumaaadka la xidhiidha mawduucaas, waxaan bartay in aan isku dayo inaan aamusnaanta sharafta leh ku ilaaliyo xaaladahan.

Waxaan bartay in aan ka fogaado in aanan maqal waxkasta waayo maqalka waxyaabaha qaarkood waa asalka dhibaataada badhkeed, dadku Way wada hadlayaan iyaga oo aan xitaa dan ka lahayn cawaaqibka ka dhalan kara oo ayna aqoonin, ruuxdayda ayaa l bartay in aanan waxkasta maqalinba. Anigu Nafteyda ayaan baadi goobayay, baadi doonkaas dagaalkii aan u galay kaligey ayaan dagaalamay oo aan kulligood ka guuleystay, laakiin hubaal muu ahayn yoolkayga dagaalku, waxay ahaayeen dagaalladii ay nolosha ku abuurtay Jidkayga oo ka soo

horjeeda doonistayda, ma aan aqoonin, mana aan qorshaynayn inaan dhaafo, markii aad se aragto aakhirka indhahaaga hortooda, waxaad samaynaysa

Waxad aad u arkayso in ayna macquul aheynba waana hubaal in aad iska tuurto meel aysan indhahaagu arkin, xaqiisday se lama huraan waa halkaas. markii aan helay barashada badh kamid ah ruuxdayda markiiba waxa aan raa-

cay waxkasta oo ay ii sheegayso ruuxdaydu iyo guuxa hoose ee gariirka wadnuhu iisoo gudbiyyaan, una soo gudbayay ilaa cidhbahayga hoose.

Waxana aan helay asalka Kalsoonida rabaaniga ah oo ay ruux kasta hanan karto markii ay u diyaarsan tahay, waxa ay iga kala qubtay Kalsooni beenaad aan ku dhaganaa oo ah Salka xanuunadayda, Kalsoonida ruuxdu si aan ugu Kalsoonaado awooddidayda aan ku guulaysan karo, haddii aad ogtahay inaad haysato taageerada Rabbaaniga ee ruuxda ah si ay kuu tageerto dhab ahaantii. waxuu arki doona ruuxkasta sida riyadiisa iyo qorshayaashu u bilaa-bayaan inay kuula muuqdaan qaar guulaysanaya ka hor intaanad gaadhinba. markii aad dhegaysato codkaaga gudaha oo aad qaado tallaabooyim dhiirigelin u leh, wax kuso celin kara majiraan, In kasta oo ay jiri karaan fursad aad kula kulmi kartid jidgooyooyin aan loo eegayn yoolkaaga aad isku dayayso inaad gaadho, waana qayb nolosha ka mid ah, ee ha argagixin!

Marka aad halkan gaadho waxa dawoobay jidhkaaga iyo naftada oo ay dawaysay u hogaan sanaanta asal ahaanshahaagu ee ay ruuxdu kuu siday , waxa aad si fudud u Noqonaysaa qof deggan dhamaan qaybaha kala duwan ee nolosha, waxa aad yeelnaysaa miyirqab dhab ah oo naftaada aad ku dhex

dareento nolosha, Marka aad dawoowdo waxaad helaysa waxa saxda ah iyo waxa khaladka ah iyo waxa u dhexeeya. Waxa aan bartay oo ruuxdaydu igu hagtay qiimaha waxkasta oo ii fududaynaya in aan daga-naado oo hore u socdo.

In aanan cidna necbaanin asal ahaan, ka-masayrin qofna, ni-yad jabinin, waxay itustay natijada cajiibka ah ee ay naftaydu leedahay, Waxaan arkay in aan ka bogsan karo cudurrada ku dhacay naftayda ee aanan aqoonin,Waa waayo-aragnimo adag oo u baahan doonta halgan joogto ah, laga yaabee sannado in ay ku qaadanayo qofkasta weliba qofka nasiibka leh.

Waxaan bartay Daawaynta dhabta ah ee aan u baahanahay in ay tahay gudahayga waxa ku jira, laakiin maan dareemayn bilawgii. Jirradu in ay xaggayga ka timid maan aqoonsaneen ilaa aan bartay, Waxa aan raadinyayba waa gudahayga kaliya in aan ka fikiro oo fahmo aya iga hor taagnayd bilawgii. da'da dhabta ahi ma aha waxa mid inaga mid ahi gaadhay cimri ahaan balse waa waxa aynu ka dareemayno gudaha una baahan in aan fahano oo barano, waayo nolosha hal mar kaliya ayaad nooshayahay.

**Hanad A Yusuf]**

**Hargeisa**

Gmail:Hanadc687@gmail.com

# A Global, Modern and Sustainable Trade Hub



P.O. Box 197, Djibouti, Republic of Djibouti

T: +253 21 35 90 70 F: +253 21 35 90 59 E: [info@dpfza.gov.dj](mailto:info@dpfza.gov.dj)

## Haddaannad Warsan ku Arag Meel Kale Ha Ka Doonin



## WAXA LAGA HELIKARAAN:

Nabaad Supermarket  
(Shaqaalaha), National  
Book Centre (Km4)

Universal Bookshop  
(Hargeysa)

Al-Risaala Bookshop  
(Bossosa)

# Xorriyad La'aanta dowla-degaanka So-malida !!



Madaxweyne Cagjar

Dalalka dunidu waxay horumar ka sameeyeen dhinacyada dhaqaalaha, amniga, Tacliinta iyo Xorriyat-ul-qawlka oo aqooniyahannadu aaminsan yihiin inuu ka qayb-qaato horumarka shucuubta Caalamka.

Haddaad u fiirsato, Dal kasta oo dunida ku yaalla oo sameeyay horumar muuqda, Hab-dhaqannda uu dalkaa sharciguusu ogol yahay waxa kaw ka ah Xorriyadda hadalka.

Marka aqoon ahaan loo fasiro

labada kalmadood ee kala ah "Xorriyad & Qawl" waa in dadka dunida ku nooli ay si xor ah fikirkooda u cabbiraan, iyadoo adeegsanaya 'Hadal, qoraal ama ficiil kale'

Qofka marka uu si kalsooni leh u cabbirayo ra'yigiisa, wuxuu isagoo shicib ah oo aan Dawladda dalkiisa door ku lahayn uu Talo iyo Tusaale ka bixin karaa habka Madaxda dalkiisu waajibkooda u gutaan, hadday dhaliil leey-ihiiina wuu sheegi karaa, si ay u saxaan, markaasina waa marka xorriyadda hadalku wax ka

tarayo horumarka dalka.

Haddii'se uu Muwaadinku dalkiisa dhixdiisa fikirkooda ku cabbiri kari waayo, kuma dareemayo xornimo waxaana iman kara in qofku wixii uu diiddan yahay ficiil xun ku cabbiro oo uu dhibaato geysto ama isagu isku geysto.

Tusaale ahaan, Dawladda degaanka Soomaalida Itoobiya oo aan ku noolahay iyo guud ahaan itoobiya waxa ka jirta caqabad dhanka xorriyad la'aanta ah, taas oo ay kala si-

man tahay Maamullada kale ee Itoobiya.

Killalka shanaad ee itoobiya oo ay caasimaddiisuna tahay Jigjiga, waxa ka jira horumar dhinacyo badan leh, sida Waxbarashada heerarkeeda kala duwan, kaabayaasha dhaqaaalaha, sida Waddooyinka oo wax badan laga qabtay, laakiin dhibaatada ugu weyn ee ka jirtaa waa inaan Qofna sheegi karin dhaliisha Maamulka ee uu arkayo.

Muwaadiniinta Degaanka Soomaalida, heer kasta oo ay yihiiin, Aqooniyahan ka qalin-jebiyey Jaamacad, mid Ganacsade ah iyo Qof xoolo dhagato ah, midna isagoo xor ah

ma hadli karo.

Qofka Xoolo dhaqatada ah, haddii deegaankiisu aanu lahayn Ceel ay Xooluhu uga cabbaan ma sheegan karo baahidaas.

Sababta waxaas u dhacayaan, waxa weeye in Madaxda Maamulku aanay ogolayn cid dhaliiشا oo sheegta ceebahooda, illaa ay gaadheen in Qofka si uun u saluugsan ay si sharci-darro ah xabsiga ugu taxaabaan, kuna hayaan muddada ay iyagu doonaan.

Sidaas oo kale, Maamulka DDSI waa iskugu mid qofka Baraha Bulshada wax ku qora iyo ka

Soomaaliga ku hadasha ee ka hawl galaysay deegaanka Soomaalida iyo guud ahaan itoobiya, sida BBC Somali, Universal TV, Horn Cable TV, Saab TV, CBA TV, MM TV, taas oo muujinaysa halka deegaanka iyo itoobiya ka taagan yihiiin xorriyatul-qawlka.

Dadka deegaanku waxay rajeeyayeen in maamulka Cagjar wax ka beddeli doono dhibaatooyinkii uu gaystay Madaxweynihii ka horreeyay ee Cabdi Iley, dadka deegaankuna gees walba xor ka noqon doonaan kana bogsan doonaan boogihii Cabdi iley, balse ma dhicin oo ma jiro hal qof oo dhallili kara hoggaamintiisa.

Dadka falanqeeya arrimaha siyaasadda marka aad wax ka waydiiso sababta dadka deegaanada Soomaali galbeed u heli waayeen xornimo buuxda waxay ku odhanayaan, 'Cabdi Ileyna TPLF ayuu u shaqaynay oo amrayey, Ina Cagjarna Abiy Axmed ayuu u shaqeyaa oo uu ka amar qaataa.'

Ugu dambayn, waxay ila tahay in xorriyad la'aanta jirtaa dhaawaci doonto nolosha bulshada, maalin kalana la garan doono dhibaatada ay horseed-day cabudhinta dadku.

**W/Q: Maxamed Muuse Cismaan**

Email: mosmaani042@gmail.com



qof si kale uga warrama saluuggiisa.

Dhammaanba waxa dhawaan laga xayiray Inay deegaanka Soomaalida iyo Itoobiya inteeda kale ka shaqeyyaan Warbaahintii afka

# Qalinkaa Wax Suureeye

## Qalinka iyo Aqoonta

Qalinka, garaadka bani'iadamka iyo nolosha falgal ka dhex sameysma ayey aqoontu ka unkantaa, kuwaas ayaa aasaas iyo isir u ah dhaxalka aqooneed ee jira, aqoonta la gaadhey marka loo eego awoodda garashada qofka laguma tilmaami karo wax weyn, laakiin hadana way mudan tahay in lagu faano, aqoontaasi waxay ka bilaabataa garashada aasaaska iimaanka iyo raacitaankiisa waxayna ku biyo shubantaa wuxuu yar ee nolosha u baahan tahay.

Qayba ugu muhiimsan aqoontu waa ta ku garansiiya ujeeddada aad u nooshahay, garashadaas waxa ay ina gayeysiinaysaa in aan si quman uga fekerno barnaamaj nololeed oo ku saleysan aqoon hufan oo isu miisaamaya haqab tirka baa-hiyaha nolosha ee keli iyo wadar ahaanba loo baahan yahay, aqoontaasi waa ta miisaanka u ah dhammaan wax soo saarka, dhaxalka maskaxda iyo muruqa. kuwaas oo ka asal qaadanaaya tilmaamaha iimaanka wanaagsan ee isku xidhaaya abuurka iyo abuuraha.



Marka laga yimaado qaybaas aqooneed ee u xil saaran hagida guud ee nolosha, waxa jirta oo muhiim ah aqoonta lagula noolaado deegaanka, taasoo ka hawlgasha sidi'i bani'iadamku uu ugu qaadan lahaa adduunka nolol dhib yar, uga badbaadi lahaa aafaooyinka kala duwan ee ay ka mid yihiin cudurada, gaajada, duufaanada ... uga faa'iideysan lahaa awoodaha lagu abuuray ee u sahlaaya inuu si xikmad iyo

ilaalin ku jirto uga midho dhaliyo hantidan hoganaysa dhulka, badaha iyo samada ee la isugu qoofalay.

In la haleelo aqoontaas lagu maalaayo adduunka ma aha mid fudud oo samada qofka kaga soo degta, waa mid u baahan doonid iyo kas dul badan oo aan libiqsiga aqoon, haddii aan tusaale u soo qaadano dadka maanta aqoonta noocan ah ku horumaray waxaynu arkaynaa in ay siiyeen hankoodii iyo wakhtigoodii sidi ay u gaadhi lahaayeen waxa ay calaamadsdeen in ay gaadhaan, waxa taas sii rumeynaaya in dadyow badan iyo ilbaxnimooyin hore oo taariikhdooda aan akhrino aan ku aragnay in ay si xilksani-mo leh uga run sheegayeen raadinta aqoonta iyo xallinta suuldaarooyinka nolosha ee ka hortaagnaa inay gaadhaan halkii ay higsanayeen.

Faraq iyo faalal wayn ayaa u dhaxeeya ummad wax u baranaysa inay ka mudnaato ummadaha kale, ku soo kordhiso adduunka hab cusub oo loo noolaado, xal u hesho dhibaato taagan sida cudur daaweyntii oo kale, u xusul duubto in ay yeelato awood ay ku muquuniso dhiggeed, ... iyo ummad wax u barata in ay warqad qaadato si ay adeege qüimo jabu ugu noqoto dhiggeed, hanti u yeelato si ay u iibsatoo wax soo saarka ummadaha kale, ku niyad samaato in laga awood waynaado, faraxeeda iyo faan-

keeduna yahay waxtar dhaqaale iyo caafimaad oo badan ayaa lanoogu yaboothay sannadkii tegay!!!

Ummadaha aqoonta leh haddii uu ka maqan yahay iimaan saxa oo hagaa, aqoontooduna ay ka aradan-tahay dhaqan wanaagsan waxa ay u soo hoynayaan adduunka dhibaato aad u culus, sabatu waxa ay tahay in haddiiba aqoontii aanay lahayn labadaas tiir oo ah kuwa huwiya aqoonta huga naxariista iyo nolosha, waxa loo adeegsanayaan dhinaca khaldan waxaana ay abuuraysaa cidhib xumo jütanta iyo tusaale lama ilaawaan ah oo la iska dhaxlo, kuwaas oo aan taariikhda nolosha ee dheer iyo ta dhowba aan ku hayno, bal is waydi sannadihi u danbeeyey adduunka waxa dad dagaal ku dhintay, dhaqaale burbur ku dhacay ... ma waxaad u malaynaysaa inay si caadi ah isaga dhaceen aafiooyinkaasi?!!!

Aqoontu waa waxyabaha ugu badan ee maanta caddaalad la'aantu ay ka jirto, waa xaqiiqo in wax gaadhistiisa loo soo maray waddooyin aanad adigu diyaar u ahayn aan si sahan laguu siinayn, waxaa xaqiiqo ah in aan marnaba laguu ogolayn noocyoo badan oo aqoonta ah in aad hesho fureyaasheeda, laakiin ma is waydiinay maxaa iga hor taagan in aan dedaalo oo aan dhaafu halka ay gaadheen? Jawaabtu waxa ay tahay in aanay jirin cid kaa hor taagan oo aan adiga iyo damac

la'aantada ahayn.

Aqoon la'aantu waa taas keen-tay in maanta uu ahaado qalinku waxa ugu qüimaha yar ee la gato, qoraalku ahaado hawsha ugu yar ee la qabto, akhri-sku ahaado waxa ugu badan ee aan la jeclaysan, waa taas keentay in dan-wadaagnima-du ahaato waxa ugu danbeeyaa ee laga fekero, keli noolaans-huhuna waxa ugu horeeyaa ee loo dedaalo, waa taas keentay in meelihii aqoonta laga baran lahaa noqdaan kuwo muran iyo mugdi ragaadiyey, waa taas bulshada gayeysiishey iyada oo aan garanayno casriga iyo taariikhda la nool yahay qaylo dhaan joogto ah oo ku saleysan biyo la'aan, dalag la'aan iyo dawo la'aan!!!

Ujeeddadu waxa ay ku xad-didan tahay qalinka iyo ga-rashadu waxay dhalinayaan aqoon, aqoontaas waxa aasaas u noqonaaya limaan, markaas ayaad hadhsan kartaa damal aad ku nageyso uumanaha , dantiisana ku raadiso wanaag , sama talin iyo naxariis, had-diiba hanka qaloooca ee qofku uu qaadan waayo wanaagaas abaal marinta ciqaabeed ee aad marinaysaa waxay dhaxalsiisa waa naxariis; naxariis jiritaan-ka ummadda sugaysa oo ku ilaalinaysa wanaag iyo isagana dembi dhaaf iyo saamaxaad u noqonaysa.

Hal ku dhig Soomaaliyeed oo run badan ayaa odhanaaya Aqoon la'aan waa Iftiin la'aan,



duruufaha noloshu waa mugdi iftiinkii lagu dhaafi lahaana waa

### **QALINKA IYO AQOONTA.**

#### **Hal-abuurka iyo Nolosha**

Noloshu uma baahna in xoogga la saaro dhismaha siyaasadda oo keliya, in kasta oo dhismaha siyaasaddu ku leeyahay door laxaad weyn habsami u socodka nolosha, haddiiba aanay jirin degenaansho siyaasadeed iyo maamul wadaag ku qotoma danwadaagta bulsho leedahay waxa dhacda in lagu xasili waayo qaybaha kale ee noloshu leedahay, lama dhiso dhaqale iyo ganaci wax ku ool ah, tacliin lama hanto, daryeelka

caafimaadna lama xasuusto.

Xaaladuhu marka ay sidaas yihi-in dadka intooda wax is bidaysaa waxa ay u xusul duubaan inay ciyaraan door udub dhexaad u noqda in bulshada lagu soo dabaalo hab dhaqan siyaasadeed iyo maamul oo horseed ka noqda dhaqaajinta qaybaha kala duwan ee noloshu ka kooban tahay, waxaa tariikh ahaan la yaqaan oo laga helay dhaxalka bulshooyinka adduunka ee kala duwan in dadka leh awood hogaamineed oo daacad ah oo ay ku lammaan tahay caddaalad aasaas u ah gudashada xilkaas ay yihiin dad aad u kooban marka loo eego tirada dadka u hanqal ta-

aga inay kaalintaas u buuxiyaan dadkooda.

Ma aha taas macnaheedu in aanay waxtar u kordhin karin bulshadooda dadkaas laga yaabo in aanay ka soo bixi karin masuuliyadaas siyaasadda iyo maamulka la xidhiidhaa, laakiin wakhtiyada noocaas oo kale ah waxa bulshada ka luma jiheeyaha, waxaan khalkhal ku yimaadaa sidi ay u fakeraysay, arrinkaas oo dhaxalsiyya in qofki u holada inuu shacabkii-sa waxtar u sameeyo uu arko in halka wax iska qabsan la'yihii ay tahay siyaasadda iyo maamulka sare ee qaranku leeyahay, taasina waxay ka lumisaa in ay jiri karaan meelo badan oo ay

Eeg Bogga 44

bulshadu u baahan tahay in wax looga qabto kuwaas oo raad fiican oo togan ku yeela-naaya siyaasadda ummadda.

Dadka jecel in ay shacabkooda iyo waddankooda wax u qabtaan waxa haboonaan lahayd in dedaalkoodu aanu ku koobnaan inay wakhti iyo maal badan ku bixiyaan arrimaha siyaasadda oo keliya, laakiin waxa fiican in si dhugasho badan ku jirto loo eego in hal-abuur lagu sameeyo qaybahan nolosha laf dhabarta u ah ee ay ka mid yihii:

**Dhaqaalah:** Dhaqaalah wadanku waxa uu door wayn ku leeyahay degenaanshaha, marka aad gaadho heer aad abuurto in bulsho weynta caalamku u baahan tahay wax soo saarkaaga isla markaana aad hoos u dhigto in baahidaada aasaaska ah aanad uga baahan in aad waddankaaga dibeddiisa ka raadiso, waxa aad ku guulaysatay in aad gudaha waddankaaga ku abuurto xasiloonaan siyaasadeed, caalamka intiisa kalena kugu eego indho qadarin iyo quiimeyn leh.

Waxa dhab ah in hadda isle'egtaas aan aad uga fog-nahay, laakiin waxa mudan in aanay ka maqnaan fekerka iyo xisaabta bulshada iyo qof walba oo jecel in uu wax u soo kordhiyo dadkiisa iyo dalkiisa. Dhaqdhaqaaqa dhaqaale ee aynu ku aragnaa waddanka waa mid aan ku saleysnayn wax soo saar, waxa uu u badan yahay adeeg,

adeegaas oo weliba qaybo badan oo ka mid ahi ay yihii kuwo abuuray culays dhaqaale, kuna soo kordhiyey shacabka müisaaniyado ay ka maarmi la-haayeen.

Waxa hubaal ah in tilmaamii hay'adaha dowladda ee u qaabilسانا inay ganacsatada tusaan meelaha looga baahan yahay inay maal gashadaan ay kaalintoodii banaan tahay, waba-haddii ay jirto istiraatiijiyad ay arrimahaasi ku xusan yihii, sidoo kale waxa iyaduna ma-qan ganacsadihiil la iman lahaa hal-abuur u saamaxa in uu bul-shadiisa u horseedo inay jiraan wax ka baxsan in laga ganacsado isgaadhsiin ama xawaalad ama raashin.

**Waxbarashada:** Waxbarashadu waxa ay u horseedaa bulshada inay garato waajibka noloshu ka rabto iyo sidi ay waajibkaas u gudan lahayd, waxa marag ma doonto ah in mar walba oo aqoonta saxda ah ee bulsho leedahay korto ay si quman ula koraan dulqaadka iyo samuhu.

Waxa jira dhaqaale iyo lacag badan oo ku baxda ardey badan oo dibedda waxbarasho u raadsata, waxbarashadaas oo haddii loo hawl geli lahaa ay ka heli kari lahaayeen meel aan guryahooda ka fogeyn, waxa keliya ee arrinkaasi u baahan yahay waa in fikrad iyo dhaqaale lagu maalgeliyo loo helo, dadka jecel inay wax u qabtaan bulshadooduna ay fahmaan in waxbarashadu ay ku jirto

meelaha loogu baahi badan ya-hay in wax laga qabto, taasooo hanka ummadda iyo wax soo saarkooda dhaqaale iyo maam-ulba sare u qaadaysa.

**Caafimaadka:** Caafimaad-ku waa halbowlaha nolosha, qof caafimaad qaba aaya wax soo saar sameeya, waxa aynu maalin walba aragnaa in xan-uunada ugu fudud aan dawadooda dibedda ka raadsano "waa qofkii awood dhaqaale u saamaxdo", waxa intaas dheer dhibta ka taagan dawooyinka iyo wixii caafimaad la xidhi-idha, waxa aan filayaa in aanay u baahneyn in aan tafaasiil badan ka bixiyo arrimaha la xidhiidha caafimaadka iyo baa-hida ay bulshadu u qabto iyo xaaladiisa hadda. Waa meal ciddii mustaqabalka dadkiisa danaynaysaa wax badan ka qaban karaan, waxay u baahan tahay in ganacsatadu fahmaan in faa'iido ganacsii iyo waxtar banii'aadamnimo ku jiraan, dhakhaatiirtuna hal ku dhig ka yeeshaan in bukaanku magan-tooda yahay.

Saddexdaas qaybood ee nolosha ka mid ahi waxay u baahan yihii dad u kaca oo wax ka qabta, maanka, muruqa iyo maalka siyaasadda loo wada jeediye qayb ka mid ah dib ha loogu soo celiyo si ay bulshada baahideeda dhabta ah uga jawaabaan.

Axmed Cabdiraxman Bashiir

qsuureeya@live.com

# Tallaabooyin waalid awood siinaya



Cilmi baadhayaasha caalamiga ah, ee wax ka qora arimaha waalidka ayaa sheegay in habka la yidhaahdo Authoritative Parent uu yahay hab aad u haboon, oo soo saari kara caruur ka gudba caqabadaha soo wajaha:

1. Dhageyso ilmahaaga (Listen to your child): waalidka awooda lihi (Authoritative Parent) way soo dhaweeyaan fikirka caruurta. Caruurta way dhageystaan marka ay caban-

ayaan waxaanay u ogolaadaan inay fikirkooda la wadaagaan.

2. Ka Caawi caadifadiisa (Validate his emotions): waalidka awooda lihi (Authoritative Parent) waa ka aqoonsada dareenka ilmihiiisa waxaa uu awood u leeyahay inuu ku qanciyo inaanu ooyin tusaale ahaan haddii waxaa uu u ooyaya khatar leeyahay xaga khatarta ka tus.



3. Tix gali dareenka Ilma-ha (Consider Your child's Feelings): Tus ilmaha in waalidku guriga masuul ka yahay lakin dhinaca kalana inaad tixgalin siinayso sida go'aankaagu saameyn ugu leeyahay dhamaan xubnaha qoyska;
  4. Nidaam sharci u samee Guriga (Make Clear rules): waalidka awooda lihi (Authoritative Parents) sharci ayay u sameeyaan caruurta waanay u sharxaan. Tusaale ahaan hadey tahay waqtigii hurdada maaha inaad tidhaahdo" seexda sidaas waanigii idin sheegaye" waxaa ka haboon seexda
  - 
  - 
  - 
  - 
  - 
  - 
  -
- hurdadu waxay faa'iido u leedahay caafimaadkiina"
5. Digniin ayuu siiya ilamaha (One warning for minor Issue): waalidka awoodalihii (Athoritative Parent) waxaa uu ilmaha siiya jawaab hadduu jabiyo sharci-ga tusaale ahaan hadaad maqsinkaaga alaabta ka hagaajin weydo manta ma ciyaareysid
6. U Iisticmaal cawaaqib in ay cashar ka bartaan (Use Consequences That Teach Life Lessons): waalidka awoodalihii (Auhtoritative Parent) waxay ilama-ha u sheegaan inuu ficol xun sameeyey lakin kuma
- yidhaahdaan waxaad tahay qof xun ama anigu waan kaa niyad jabay IWM
7. Waxay balan qaadaan Baqshiiş (Offer Incentive): waalidka awoodalihii (Au-thoritative Parent) waxaa uu siticmaala nidaamka abaalmartinta (Reward system) si uu ilmaha u dhüri galiyo tusaalle ahaan markuu ilmuuhu wax xun sameeyo waxay u balan-qadaan Baqshiiş si ay dariiqa ugu soo dabaalaan;
8. Dookhiisa inuu doorto wax uga ogolow (Let Your Child Make Little Choices): waalidka awoodalihii (Authoritative Parent) waxaa uu

- ilamaha u ogolaada inuu dookhiisa ciyara mararka qaar taasi waxay ilmaha awood u siisaa inuu mustaqbalka go'aan gaadho. Tusaale ahaan ma waxaad dooneysaa inaad qolkaaga nadiifiso qadada ka hor mise ka dib.
9. Isku miisaan xoriyada ilamaha iyo masuuliyada (Balance Freedom With Responsibility): waalidka awoodalih (Authoritative Parent) ilmahooda waxay u diyaariyaan inuu noqdo masuul howlo badan guul ka gaadha hadana waxay isku miisaamaan xoriyada iyo masuuliyada tusaale: ilmaha ayaa diyaargarowga subixii kala ilaaba alaabti-

- sa waxay u sameeyaan jidwal albaabka ku yaala oo ay ku qoranyihiin waxaa uu subax kasta qaadanayo ama qabanayo iskuulka ka hor.
10. Khaladka waxay u rogaan fursada laga faa'iideysto ( Turn Mistake into Learning Opportunity): waalidka awoodalih (Authoritative Parent) lama yaaba khaladka ilamaha balse waxay u rogaan fursad wax lagu saxo tusaale ahaan ilmaha ayaa qaataay alaab qof kale leeyahay waxay odhanayaan inaad qaadato albaab qof leeyahay waa khalad waxaanay dhaawaceysaa sharaftaada qofka kala qalbigiisa.
11. Dhiirigalinta isku talo gal ka ( Encourage Self-Discipline): waalidka awoodalih (Authoritative parent ) ilmaha waxaa uu baraa sidii isagu shaqadiisa u qabsan lahaa si madax banana sidoo kalana sidii uu naftiisa u ilaalin lahaa.
12. Xoojinta xidhiidhka ilmaha (Maintain a Healthy Relationship With Your Child): waalidka awooda (Authoritative Parent) badani waa ka joogteeya xidhiidhka ilmaha islamarkaan waqtii badan la qaataa xataa maalmaha uu ilmuu edeb darada sameeyo.

**Diyaariye:** **Mohamoud Dahir Omar**

Bandhige@gmail.com

## Haku Mashquulin Ceebaha Dadka Kale!



**D**enbiyada waxa asal u ah oo keena Kibirka waana kan Iblis naarta geliyay, Jacaylka Mansabka iyo Nolosha Aduunyada waa kan Fircoon ku halaagsamay. Xasduku isna waa kan ku kelifay in wiilkha Nebi Adam Dhalay ee Qabiil uu dilo walaalkii (Habiil).

Caalamadaha liibaanta iyo nolosha wanaagsan waxa ka mid ah : Mar kasta oo adoonka u korodho cilmi waxa u kordha tawaaduc iyo is dhul dhig iyo kibirka oo uu fogaado. Mar kasta oo u kordho aduunyona waxa bata taxadarkiisa iyo cabsidiisa uu Allah (sw) ka baqanayo, mar kasta oo ay u kordho sharaf iyo derejona waxa u siyaada usii dhowaanashaha uu dadka usii dhowaanayo iyo buuxinta baahiyahooda.

Wanaag waxa helay qofka kaga mashquula ceebihiisa , ceebaha dadka kale. Waxaana jabay kan ilooba ceebihiisa oo u banbaxa sheegidda ceebaha dadka kale.

# Sharcigu Maaha Qabyaali !!



shutterstock.com • 1916108923

**W**axaa la yidhi waqtiyadii Soomaaliya uu xoog ga ku haystay Xisbigii Hantiwadaagu ayaa madal Obole ah oo Madaxweynihii fadhiyo la isku guubaabiyay in laga wada shaqeeyo dhismaha xisbiga. Waxaa kale oo la tilmaamay in qofkii ka hadha Tareenkaas socda waa Kacaanka'e, aan waxba loo noqonayn, nin ka mid ah Kaadirkiir shirka ka qayb galay ayaa kacay, waxaana laga qoray haddal duur xul ahaa oo wuxuu yidhi. "Madaxweyne in aanaan Tareenkaas Xisbiga ka hadhin waa ku dedaalaynaa, Laakiin, anigoo xajisanaya oo ku dhegan haddii la iga tuurayo ka waran."

Intaasi waa kaftan. Wuxaan uga gudbayaa, baryahan waxaa soo noqnoqotay arrin la xidhi-idha cabashada dad sifo aan sharci ahayn loogu diiday Jinsi-yadda Somaliland.

Marka koowaad waa inaynu isla qirno, qof meel fadhiya oo hadduu doono masuuliyad hayaa

heerka uu doono ha joogo'e dookhiisa shakhsiga ah wixii uu doono kuma sameyn karo, cid-dii uu doono sharci kuma siin karro midka jinkisu sanifo ama uu tafuur ahaan isirka uu ka soo jeedo u neceb yahayna kagama hor joogsan karo.

Sidaas oo kale, Xuquuq shar-

cigu u ogolaaday, ruuxna kuma waayi karo Beesha uu yahay. Haddiiba ay dhacdo oo sarkaal dawladeed si badheeh ah ama si kama ba ah uu u jiidho xariiqii nidaamku u xaddiday, dabadeedna ku xad-gudbo xaqa muwaadin kale, waa in aynu ka dhiidhino oo m arkaba wax laga qabto.



Marka aynu sidan leenahay, maaha macnaheedu in laga soo horjeedo oo gabi ahaanba la diidhan yahay in nidaam la hubiyay oo baadhiseed la marriyo qof kasta marka la joo-go bixinta jinsiyadda. Wuxaan dadka qaar u arkaan in waaxda Jinsiyadu ka mid tahay meelaha ugu musuqa yar ee la mahadiyay. Laakiin, shaqo kasta oo socota dhaliilo ayaa ka soo no-qda, waana in la toostosiyoo oo hadba wixii ka xun la saxo ileyn korriin nidaam ayaa socda'e.

Haddiise dhagaha laga furaysto cabashada oo aan sida loo fuliyay sharci iyo sharci darro midka ay tahay hubinteedda

la joogteyn, markaas waxaa imanaya in la jabiyo qodobka 8-aad ee Dastuurka Somaliland. Qodobkaas oo si cad u damaanad qaaday sinnaanta muwaadiniinta, islamarkaana reebay kala saarayn ku dhisan midabka, qabiilka, dhalashada, luqada, lab iyo dhedig, hantida, mudnaanta, afkaarta iwm.

Waxaa kale oo immanaya Ta-koor aanay sinaba qiiil ugu no-qon karin, qodobka Afraad ee Dastuurka iyo qodobada labaad iyo saddexaad ee Xeerka Jinsiyadda Xeer-No-22-2002, kuwaas oo faahfaahiyay muwaadinnimada u dhalashada ah iyo qaabka lagu helayo aqoon-

siga.

Ugu danbeyn, waa in sharciga loogu dhaqmo sida uu yahay (law as it is), ee aan laga dhi-gan hadba sida uu jecelyahay sarkaalka jooga xafiiska Jinsi-yaddu islamarkaana la dabaqo qodobka 8-aad ee dastuurka farqadiisa 2-aad oo u dhigan si-dan: "Kala sarraynta iyo takoor-ka ku salaysan issirka, abtirsiga, dhalashada iyo deegaanku waa reebban yihiin, isla markaa bar-naamijada lagu cidhib tirayo dhaqamada xunxun ee soo ji-reenka ah waa waajib Qaran"

**Mustafe Sh. Cumar Geeddi**

## Gabadhu saboolnnimo ninka wey ku diidi kadhaa

**G**abadhu xaq shareecadu ogoshahay ayaa ay u leedahay in ay ninka ku diiddo saboolnimada. Wuxaaba la hayaa Nebiga (SCW) oo gabadh saxaabiyad ahayd oo la odhan jiray Faatima Bint Qays kula talinaya, in aanay guursan asxaabigii weynaa ee Mucaawiya Bin Abi Sufyaan, (Alle ha ka raalli ahood labadoodaba), isaga oo sababta ku sheegaya in uu yahay faqiir aan maal lahayn.

Waxa se iyaduna jirta oo Qur'aanka Karuumka ah ku cad in Allaah (SWT) uu risiqa u fu-



Eeg Boggaa 50

rayo addoomiisa saboolka ah ee isu guursada in ay isku dhowr-soonaadaan.

Waxa aad mooddaa in ay dadka iskaga qaldantahay danta bulshada ee markaa jirta, iyo shareecadu. Waan aaminsanahay in maanta ay bulshadeennu u baahan tahay in guurka la dhiirrigeliyo, waayo waxa aynnu nahay bulsho boqolküba 70 dhalinyaro ah, saboolnimada iyo jeeb madhnaantuna ay ku badantahay. Sidas awgeed, in guurka maal lagu xidhaa ay keeni karto guur la'aan badan iyo in ay bataan dembiyada shareecada ka dhanka ah ee bulshadeenna burburka dhaqan u horseedi kara.



Dhowaan gabadh Sheekh Muna la yidhaahdo ayaa jeedisay hadal nuxurkiisu yahay, in dumarka ay diiendaan guurka ninka faqiirka ah. Waa lagaga aragti duwanaan karaa, iyada oo lala akhriyayo duruu-feenna, ama caddaymaha kale.

Waxaa se la yaab ah, in mar keliya ay ragga dalka, ama Soomaalida badankooduba ay ka qayliyeen hadalkaas, wadaaddo badanina si diini ah u naqdiyeen, iyada oo aan sidaas looga guban hadallada ninka Daaci Saalax la yidhaahdo ee bilaha badan innala hortaagnaa hadallo badan oo deelqaaf ah ama shaciga iyo dhaqankuba ay diidayaan.

Waxa ka mid ah wasaaradda diinta iyo awqafta Somaliland, maalmo yar gudahood ayaa ay ugu yeedhay gabadhaas, weliba raal-ligelin lagu kallifay, iyada oo aan mar keliya loo yeedhin ragga

uu ninka aynnu magacawnay ka mid yahay, ama qaarkood wadaaddo sheegtaan ee maalin kasta jeediya hadallada aan qilka lahayn ee haweenka ka dhanka ah.

Markii hadalka gabadhani soo baxay, golaha wakiillada Somaliland ayaa dhaqso ugu yeedho Sheekh Nasiiba Aadan Siiro, waxa ay wax ka weydiyeeen hadallada sheekh Muuna ee guurka faqiirka, maadaama oo ay ka hadashay munaasab ay abaabulkeeda lahayd Sheekh Nasiiba. Goluhu waxa uu haweenkan amar ku siiyey in ay arrimaha fatwada uga dambeeyaan culimada waaweyn.

Waa tallaabo sax ah, sida oo kale waxa ay ku ammaanan yihiin in ay hablahan bogaadiyeen, kuna dhiirrigeliyeen sii wadista dadaalkooda diineed. Waxa se su'aashu tahay maxaa hadda keenay yeedhmadan degdegga ah, iyada oo la ogyahay tobannaan rag ah oo habeen iyo maalin wacdiyo muran abuura jeediya, fatwooyin marar badan hadal ka soo noqdana sheega, laakiin aan mar keliya lagu odhan culimada waaweyn u daaya fatwada.

Tallaabadaas wasaaradda iyo golaha wakiilladu waa hawl sax ah, laakiin ciddii ku habboonayd aan laga wada qaadin.

**Waxa diyaariyey: Xigasho:Ka-maal marjaan**

# Markaad imaam ku dabatukanayso Faataxada miyaad akhrinaysaa



**S**uuradda Faataxada akhrin-teedu waa tiir ka mid ah tiirkanka salaadda, waana waajib in la akhriyo ragcad kasta oo salaadda ka mid ah, sida ay qabaan afarta mad'hab, iyaga oo daliishanaya xadiiska Bukhaari iyo Muslim soosareen ee nebi Maxamed NNKH, yidhi: "Salaad uma guntamayso qofka aan akhrin faataxada."

Dooddu waxay tahay qofka ku dabatukanaya imaam isaga miyaa lagu leeyahay in uu akhriyo faataxada mise waxa ka gudaysa akhrinta imaamku akhrinayo? Iswaydiintan waxa sabab u ah addilada arrintan ka

hadashay oo mar muujinaysa in la akhrinayo, marna amuuusnaan tilmaamaysa iyo kala duwana-anshaha fahan ee saxaabada iyo taabiciinta ee masaladan.

Tusaale ahaan saxaabada iyo taabiciinta qaarkood ayaa laga soo wariyaa in ay qabaan in faataxada salaadaha jahrigaa-quraanka kor loo qaadlo iyo kuwa sirrigaa-quraanka hoos loo dhigo ay waajib tahay in faataxada qofka imaam ku dabatukanaya akhriyo, halka qaar kalena laga hayo kuwa sirrigaa hala akhriyo, kuwa jahriga ahna hala aamuso, qaarkoodna waxa laga haya in ay leeyihii

yaan waxba laga daba akhrin imaamka ee aamusnaan halagu dhagaysto.

Madaahübta fiqigu arrintan way ku kala aragtii duwan yihiin Xanafiyada, Maalikiyada iyo Xanaabiladu waxay qabaan in aan la akhrinayn faataxada, dooddooduna waa in imaamku kaga filan yahay qofka ku dabatukanaya akhrinta faataxada. Wuxuu aanay daliishanayaan aayadda suuradda Acraaf ku jirta ee odhanaysa, "Quraanka marka la akhrinayo u dhagraaciya oo aamusa."

Arrinkan saxaabada waxa ku

tagsan Caa'isha iyo Cabdillaahi ibnu Mascuud, taabiciyiintana Cabdillaahi Ibnu Mubaarak iyo Isxaaq bin Raahawayh.

Shaaficiyadu waxay qabtaa waajib in ay tahay akhrinta faataxadu

salaadaha kor loo qaado, oo aanu imaamku qofka ku dabatukanaya kaga filnaanayn, waxaanay daliishanayaan xadiiska odhanaya: salaad uma guntamayo qofka aan faataxada akhriyin. Mad'habtan arrintan waxa la qaba Bukhaari, Ibnu Xasmi, Shawkaani, halka saxaabaadana Cumar Ibnu Khaddaab, Cubaada Bin Saamit, iyo Cabdillaahi Ibnu Subayr ay qabaan.

Shaaficiyadu salaadaha Quraanka hoos loo dhigayo waxay qabtaa faataxada la akhriyaa in ay waajib tahay, halka Maalikiyada iyo Xanaabiladu leeyihiin faataxada akhrineedu waa türarka salaadda, sidaa daraadeed qofka keligii tukanayaan waa ku waajib in uu akhriyo, haddiise uu imaam ku dabatukanayo waa sunne akhrineedu.

Kitaabka Majmuuca im am Nawawi wuxu ku tilmaamay in ay waajib tahay akhrinta faataxadu, salaadaha Quraanka kor loo qaadayo iyo midda hoos loo dhigayaba, sida oo kale imaamka iyo qofka ku dabatukanaya in ay labadoodaba akhriyaaan faataxada.

Xanafiyadu waxay leeyihiin salaadda kor loo qaado akhrinta Quraanka iyo midda hoos loo dhigaba waa la aamusayaa oo waxba la akhrin maayo. Maalikiyada qayb ka mid ah ayaa iyadu la qabta, saxaabada arrinkan qaba waxa ka mid ah Sayd bin Saabit iyo Jaabir bin Cabdillaahi, halka taabiciyiinta ay qabaan Sawri iyo Sufyaan bin Cuyeyna.

Abubabar Ibnu Carabi wuxu leeyahay: salaadaha Quraanka hoos loo akhrinayo qofka imaam ku dabatukanaya waa ku waajib in uu faataxada akhriyo, laakiin kolka Quraanka imaamku akhrinayo waa in uu aamuso.

Fuqahada casrigan qudhoodu way ku kala aragti



duwan yihiiin dooddan muddada dheer soo taagnayd, waxanay kala raacsan yihiiin madaahibta arrintan midba meel ka taagan yahay.

Sheekh Dedow oo ka mid ah culimada ugu aqoonta badan wakhtigan wuxu leeyahay: sida wanaagsani waa in uu akhriyo faataxada qofka imaam ku dabatukanaya, iyada oo lagu dhaqmayo xadiiska odhanaya salaad uma sugna qofkaan faataxada akhrin, hoos ayaa-nu u dhigayaa akhrintiisa oo imaamka tushuush ku furi maayo, meelaha uu imaamku aamuso ayaanu akhrinaya, haddii imaamku hakan waaya-na kolka uu suurad kale bilaabo ayuu faataxada akhrinaya.

Xarunta Fatwada Masar-Daaru Iftaa waxay fatwoodeen in la tuijyuhu akhrinayo faataxada salaadaha kor loo qaado Quraanka iyo kuwa hoos loo dhigaba,

sida oo kale waxay ku taliyeen in imaamku kolka uu faataxada akhriyo inyar sugo si qofka ku dabatukanaya u akhriyo. Daaru-Iftaa waxay garab istaageen mad'habta Shaaficiyada oo xujooyin adag haysata oo muujinaya in la akhrinayo faataxada.

Maqaalkeennani wuxu xooji-naya midda ay qabto Shaaficiyadu ee ah qofka imaam ku dabatukanaya in uu akhrinayo faataxada salaadda kor loo qaadayo iyo midda hoos loo dhibaba.

Dooddeenu waa in aanu jirin nas cad oo tilmaamaya qofka imaam ku dabatukanaya in aanu akhrinayn faataxada, hal-ka xujada aynu u hayno akhrinta faataxadu tahay suuradda Musamil ee Alle SWT leeyahay, "Akhriya wixii idiinka fududaa-d Quraanka." Middaas oo culimadu leeyihiin: aayadda amarayaa ku jira la ina amrayo mar-

ka aynu salaadda tukanayno in aynu akhrinno Quraanka, amarkuna wuxu faa'iideeyaa waa-jibnimo.

Xujada labaad waa xadiiska tilmaamaya in aanay salaad u jirin qof aan faataxada akhrin, dooddha ah imaamkaa ku filanna nas cad looma hayo, aayadda Quraanka ee tilmaamaysa in la aamuso kolka Quraanka la akhrinayo kuma cadda in aan faataxada la akhrinayn, sida xadiiska ay ugu caddahay in aan la aqbalayn salaad aan faataxada la akhrin, sidaa ajligeed waxaynu dhaqangalinaynaa akhrinta faataxada salaadda kor loo qaadayo iyo midda hoos loo dhigayaba, sidoo kale haddaad kali tukanayso iyo haddaad imaam ku dabatukanayso labadaba waad akhrinaysaa faataxada

**WQ: Sheekh rakuub**

## Xabaaluhu way hadlaan ee dhegihii maqli lahaa ayaa awdan!

Xagaagii 2014 anigoo magaaladda Toronto ee dalka Kanada jooga, ayaan maqaal qoray magaciisu yahay 'Farriinta Toronto iyo caasimadaynta Hargeysa'. Dulucda ujeedadu waxay ahayd in Hargeysa, si kasta oo afarta beeni-jaho ay isku feeraariso, waddooyin, daaro iyo huteello casri ah laga furo, aanay misna ugu fillayn inay magaca caasimad qaadi karto inta arrintani maqan tahay – Facaadda dhalanaysa jeer loo sii diyaariyo habkii, goobtii iyo xanna-

nadii ay ku kori lahaayeen inta ay taabba-gal no-qonayaan, qarannimadda iyo dawladdnimadda lagu tanaadayaan waa magac hadoof ah iyo wax-kama-jiraan. Magaalada Torontona waxaan tilmaan u soo qaatay sida geedka iyo barta biyaha ah loo ilaashado, dawladda iyo dadkuba, iyadoo aan sheegayo in hodannimada dalkaas meelaha laga arki karo ay tahay dabeeecadda dhulkeeda ee biyaha iyo kaymuu yihiiin kuwo lagu ashqaaraarayo.

Xilligaas markii laba sano ka soo wareegtay, ayaan 2016 iskeenay ceel-macaankii Hargeysa. Muddadii booqashada aan ku talo galay oo aan weli iga dhammaan ayaa war dhüillo ah isoo gaadhay. Nin aan waxbarashadiisii sare qayb ku lahaa ayaa geeridiisa la iiga soo waramay. Alle ha u naxariistee, Maxamed Maxamuud Xandulle, Danjirihii Soomaaliya u fadhiiyey Moosko ayaa magaaladaas ku geeriyooday, aan aaskiisii oo Hargeysa ahaa ka qayb galay.

Ehel iyo asxaab badan ayaa aaskii isugu yimi. Xaaskiisii iyo gabadh uu dhalay oo Ruush ah ayaa maydka Moosko ka soo

raacay oo aaska yimi. Aniga laftayda waxay ii ahayd markii iigu horraysay ee aan xabaala-ha Hargeysa isha saaro. Dhawriyo-labaatankii sano ee u dam-beeyey, magaalada London ayaan si rasmi ah u degganaa. Sidaa darteed, tijaabadani waxay ii ahayd mid hor leh. Xagaaf ciid badan oo aan jaho lahayn ayaa xabaalaha loo sii maraya. In la gaadhay iyo in kale, kala garan maysid ee adigoo dhex maraya ayuun baad is arkaysaa.

Gadhwadeen khabir ah ayuun baa garan kara xabaasha aad u socotaan geesta ay idinka jirto. Xabaalaha aanu sii dhex maraynaa ma laha magac iyo astaan

lagu garto. Mar aan su'aasha soo jeediyyna, waxa la iigu jawaabay in xabaasha aan la aqooni ugu ajar badan tahay. Anigu bariga London ayaan degganahay. Xabaalaha Muslinka oo aan in badan tego ayaan ka war qabaa. Goob weyn oo dhul cagaar ah ku taal ayaa xabaalan loo qoondeeyey. Xabaaluhu way safan yihiin, wayna is cabbir le'eg yihiin. Mid waliba magaca qofkiii ku duugnaa ayaa ku kor qoran. Isku si ayaa loo wada aasaa, loona daryeela. Hab iyo hannaan la raaco ayaa u dejisan oo aan laga baydhi karin. Dhis-maha daaraha magaaladda sida loogu talo galo, qorshe aan ka



dhicin ayaa aaska maydka loo raacaa.

Iyadoo habkaasi maankayga ka shidan yahay, ayaa sidaan u dhix marayay xabaalihii, saaxiibkay Siciid Axmed i tusay xaaskii marxuunka iyo inantii-sii Ruushka ahoo oo gabaahiir boodh iyo siigo ka dhacayso dhix taagan, hal cabbaar ahna u jira xabaasha maydkii saygeeda lagu aasayay (Waan ka war qabaa in haweenka muslinka ah loo oggolayn inay xabaalaha tagaan).

Midda keliya ee aan hubaa waxay tahay in xaaskaa iyo inanteedu intay dayuuradda soo saarnaayeen aanay marna maankooda ku soo dhicin nin-keedii Moosko safiirkha ka ahoo inuu geeridiisa ka dib goobtaa ay u jeeddo dayaca iyo darxumadda ku haysata uu ku dambayn doono. Taas oo waliba dadkii marxuunka saaxiibtini-

mo, gacaltooyo iyo qadderin u hayay isugu wada yimaaddeen. Anigu Ruush ma ihi, diinnna lama wadaago, waxase ii baxay mid aan isleeyahay waa run jirta oo loo baahan yahay in cashar laga korodhsado. Dacdarrida iyo dayacsanaanta xabaalaheenna ka muuqataa waxay si cad uga marag kacaysaa in aan ubadka soo dhalanayana daryeel loogu talo galay aanu jirin.

Xabaaluhu way hadleen waxay yidhaahdeen; "Maydkii ayaan u jeedaa goobta la dhigay, is-agoo la ogyahay diin, dadnimo iyo darajadu ku dhix la-haa ummadiisa uu ka baxay ee ma mid uurka ku jira ayaa naf loo hayaa?" Waa ummad aan mustaqbal lahayn. Mustaqbal-ka aan sheegaya waa midka aynu innagu qorshayntiisa u xil saarannahay. Meelna dhagartaa loogama dhuuman karo. Si-yaasi, aqooniyahan, ganacsade,

wadaad, sarkaal sare, dhammaantood way u wada jeed-aan sida caasimadda Hargeysa ay dhinac walba si xad dhaaf ah ugu fidayso dhismo ahaan, misna carruurta iyo barbaarta soo koraysaa goob ay ku nastaan, goob ay ku ciyaaraan, goob dhaqan iyo farshaxan oo ay tababar ku qaataan, dareenkooda ku safeeyaan qorshaha laguma doro.

Sida qaalibka ah, meherado iyo meel beesad lagu urursado ayaa la dhaafsatay barbaarin-tii ubadka soo koraya iyo dalka aayatiinkii. Ubadku waa mustaqbalka ummadda cidi hoggaamin lahayd. Daryeel la'aantoodu waa hungo iyo habaas laga dhaxlo iyo daara-haas dhalaalka weyn oo dum-dumooyin isu roga. Xabaaluhu way hadlaan ee dhegihii maqli lahaa ayaa awdan.

**Qoraa: Siciid Jaamac Xuseen**

## Adiga Ayaan Kuu Shaqeeyaa

Hadda ayuu kasoo galay shaqo iyo shirar qaataay saacado dhawr ah, oo uu la galay qaar ka mid ah Golhiisa Wasiirrada iyo marti kale oo uga timi dawladaha jaarka ah.

Waxa uu u yeedhay mid ka mid ah shaqaalihii, waxa uu ku yidhi; "Maanta waan daalay oo qado waafi ah ayaan u baahanahay'e, inanka cuntada karinaya inoogu dir Kalluun. Kalluun ayaan maanta aad ugu niyadsamahaye! ". Ninkii shaqaalaha ahoo ayaa yidhi; "Haye, Mudane Madaxwayne, Kalluunka waliba waad u baahan tahay oo daalka waa ka dawo, sidoo kalana waxa uu leeyahay Faytamiinno jidhka iyo maskaxdaba soo celinaya oo waan hubaa in kolka aad cunto aad firfircoonaan badan ka heli doontid"

Madaxwaynihii ayaa ku yidhi; "Inkastoo calooshu igu xanuunto, haddana yeelkeed'e inoo dir." Ninkii ayaa ku jawaabay; "Mudane Madaxwayne, waa runtaa oo Kalluunku calool xanuun ayuu leeyahay, ba-layaadu waliba waa wada lafo oo haddii midh keli ahi kuu dhuumato waa khatar, sidoo kelana yalaalugo iyo laabjeexna way u raacaan!"

Madaxwaynihii oo yaabban ayaa ninkii waydiiyay; “**Waar miyaad xanuusanaysaa? Halkaad hal mar ammaan iyo dhaleecayn wada socda isugu daraysaa Kalluunka?**”

Ninkii ayaa ku jawaabay; “Madaxwayne, anigu adigaan kuu shaqeeyaa ee Kalluunka uma shaqeeyo, wixii aad tidhaahdabana waan kugu raaçayaa, haddaad ammaantana waan u kula ammaani, haddaad dhaleecaysana aakhiro ayaan u dirayaa”!

Dhacdo ka mid ah kumannaanka dhacdo iyo sheeko ee guulwadaynta indhaha la’ ah ee ka dhacda dunida aynu ku noolnahay ayay dhacdadani tusaale u tahay! Waa Madaxwaynihii wadanka Masar, Jamaal Cabdinaasir oo khudbad ka jeedinaya aqalka Golaha Wakiillada ee dalkaas, kaddib markii ay

ayaa nin Boqor ah oo duurka u ugaadhsii tagay waxa uu la kala baxay leeb iyo qaansadiisii si uu ugu gano shinbir geed u dhaw saarnayd. Kolkii uu ku ganay ayuu la waayay, isla markiiba mid guulwade ah oo ag booday ayaa la soo booday; “**Boqor, si wanaagsan ayaad yee-shay!**” Boqorkii oo yaabban ayaa yidhi; “**Oo maxaan wa-naajiyay waaban la waayae!**” Ninkii ismaba uu dhibine aad yar ayuu ku jawaabay; “**Boqoroow lamaad waayin'e shin-birta ayaad u naxariistay**”.

Waxa iyaduna aan kuwaas hore ka fogayn dhacdo kale oo la yaab lahayd. Waa Madaxwaynihii wadanka Masar, Jamaal Cabdinaasir oo khudbad ka jeedinaya aqalka Golaha Wakiillada ee dalkaas, kaddib markii ay

isku dhaceen Masar iyo Suuriya. Waa Madaxwayne Cabdinaasir yidhi isagoo Golaha hortaagan; “**Waxa aan amray ciidamadeenna baddu in ay dhaqaaqaan oo ay Suuriya ku duulaan...**” Isagoo halkaas maraya ayay xildhibaannadii sacab isla oogsadeen, kolkii ay sacabkii dhammaysteen ayuu hadalkiisii sii watay oo yidhi; “**Haddana waxa aan ka fikirkay midawga carbeed oo waxa aan amray ciidamadeennii in ay soo laabtaan!**”, sidii hore si ka badan ayaa haddana sacabkii isu qabsaday! Cajiib!

Guulwadaynta indhaha la’ ee aan tilmaamaynaa waa taas ah in laba fal oo iska soo horjeeeda daqiqad gudaheed sacabka loo wada garaaaco!



Waxa aynu dhammaan ognahay in qof kasta oo Madax ah meesha uu doonaba ha joogee, inuu leeyahay in ka ag dhow oo uu la tashado. Ha noqdo Madaxwayne wadan idilkii maamulaya, Wasiir, Maamule Shirkadeed ama dugsi iyo wixii la mid ah. Qofka haddaba cid hawl ummadeed haysa ka-ag-dhow, waxa ku habboon inuu qofkaas runta u sheego, talo wanaagsan oo sidii ugu mudnayn ee uu yeelilaha ahna uu la wadaago, taladaas oo qalbi iyo daamir saafiya uu ku gudbinayo, waxbana aanu ka habranayn, sidoo kalena aanu islahayn wax ku hel, ku dhac ama cid kale ku duudsi, waa sida laga rabo qofka madaxda ka ag dhow wixii uu qofkaas madaxda ahi kala tashado.

Nasiibdarrdu'se, waxa ay tahay, in Alle, damiirkha iyo dadnimadaba u badbaadiyay oo tiro ahaan koobmaysa sida runta ah, mooyaane, in loo badan yahay "Guulwadayaal" u sheega qofka Madaxda ah inuu keligii saxsan yahay! Salaamaad! Xilli-yada qaar saxnaantaasi waxa ay noqonaysaa mid dhaw, marka loo eego "Guulwaydayn"-ta Indhaha la! Waxa madaxda loogudaraa in ay saxansiyin, tilmaamo kale oo ay mid noqon karaan, hadal u dhigma;

In bulshada aanu dib usoo mari doonin mid isaga la mid ahi.

In bulshadaasi tahay mid naasiib badan kol haddii hebel Madax u yahay'!

Guulwadayntaas danbe waxa ka

Tusaale noqonaysa, mar dhaawaan uu Jabuuti ka lahaa mid ka mid ah kuwa Ilaahay innagu imtixaamay "Waligiin idin soo mari maayo madaxwaynahan oo kale, kii beddeli lahaana wali muu dhalan" Beerka lagugu dhufay ma idhaahdaa, bal ummaddaas dhan sida uu u caqli caayay u fiirso.

Madaxdan gurracan ee haddana isla saxan, in badan oo ka mid ah dhibaatooyinka ay innagu hayaan waxa sabab u ah inta ka agdhaw ee sacabka iyo mushxaradda la ag joogta, inta guulwadaynta iyo madax buuxinta mooyee aan dhaqan kale aqoon,

Waa kii lahaa Abwaan, Maxamed Ibraahim Warsame -Hadraawi – Ilaahay caafimaad



Eeg Boggaa 58

sareecan ah ha siyyee ;-

"Gar-ma-qaatayaashiyo dadkaa  
beera, ruux gudhane

Ganbo nimaan la soo bixin had-  
dii, guulo lagu waabo

Markuu dhaawac geystaba had-  
dii, loo gargarateeyo

Isagoo canaan lagu gudbiyo,  
gaarran filanaaya

Giblo iyo haddii sacabbo lulan,  
loogu gogol-xaadho

Keligii inuu guurti yahay, maa-  
lintaan gunud!"!

Dadka noocas ah ee marwal-  
ba la hoos taagan Madaxda in  
xukuumadaha ay gadhwadeen-  
ka ka yihiin ay yihiin kuwii ugu  
wanaagsanaa ee bulshada soo  
mara, waa kuwo khiyamo qa-

ran kula kacaya bulshada, sidoo  
kalana si aanay dareensanayn  
, waxa ay hoojinayaan, ka ay ka  
hoos shaqaynayaan oo haadaa-  
mo ay uga tallaabsanayaan!  
Go'aanno badan oo aynu maan-  
ta la rafaadsannahay, waxa hu-  
baal ah in aanay inta ugu badan  
yimaaddeen, haddii uu ninka  
talada hayaa helo cid gacanta  
qabata oo wixii wanaagsan u  
sheegta, wixii gef iyo gardarro  
ahna ka qabata!

Bulshada kolka lagu soo rogo  
kumannaan cashuuro ah oo  
aanay qaadi karin, ma aragtay  
qof muwaadin ah oo sheega-  
naya "Dhaqaaleyan" oo bul-  
shada ugu dhaaranaya in ay  
cashuurtani tahay mid sharci ah  
oo baahi loo qabo? Ogow oo  
isaga laftiisu wuu ogyahay in ay

tahay xaqdarro se waa dhaqan-  
ka Guulwadaynta iyo Madax-  
wayne adigaan kuu shaqeeyaa!

Aynu dhanka kale u rogno  
hadda'e, ma aragtay marar  
badan, Wadaad, boqollaal  
"Aayadood" u soo qaadanaya,  
go'aan uu qaatay nin Madax  
ahi, si uu innoogu sheego in  
go'aan kaasi sax yahay? Yaah!  
Waxba ah yaabin akhriste, aad-  
yar adiga oo aan dhibtoon waxa  
aad ogaata, "isagu si waafiya  
ayuu u ogyahay inta badan, in  
aayadda iyo xadiiska uu luqun-  
jibaadhayaa aanay halkaas  
munaasib ku ahayn", Balse  
waa dhaqanka Guulwadaynta  
iyo Madaxwayne adigaan kuu  
shaqeeyaa oo halkaa la galaya!

**Xamse Cumar Kujoog**



## WAXA LAGA HELIKARA:

Nabaad Supermarket  
(Shaqaalah), National  
Book Centre (Km4)

Universal Bookshop  
(Hargeysa)

Al-Risaala Bookshop  
(Bossosa)

FOR  
ADVERTISING  
SPACE  
CALL:

**+252 616 460 132**

**Email: warsan54@gmail.com**



SOS CHILDREN'S  
VILLAGES

# TUULADA BARBAARINTA DHALLAANKA





# BENADIR UNIVERSITY

*Cultivating Human Talents*

*Leading University in Somalia.*



## MOST POPULAR PROGRAMS

- ★ Faculty of Medicine and Surgery
- ★ Faculty of Education
- ★ Faculty of Computer Science & IT
- ★ Faculty of Engineering & Technology
- ★ Faculty of Sharia and Law
- ★ Faculty of Agriculture
- ★ Faculty of Veterinary
- ★ Faculty of Health Science
- ★ Faculty of Economic & Management
- ★ Faculty of Geoscience and Environment
- ★ Faculty of Dentistry
- ★ Faculty of Social Science
- ★ Faculty of Marine Science



**BENADIR UNIVERSITY**  
*Cultivating Human Talents*

📍 Prof. Addow Campus, Behind Seybiyano  
Mogadishu, Somalia

☎ +2521 857536 / 857537 / 858990

✉ info@bu.edu.so

🌐 <https://bu.edu.so/>